# Tahriibka Dhalinyarada Soomaaliya

## Sababaha Keena, Cawaaqibta iyo Siyaabaha Loo Xallin Karo




Mahad Waasuge



Abriil 2018

Waxaa faafiyay Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda, 2018, Muqdisho, Soomaaliya

**Qoraaga:** Mahad Waasuge waa cilmibaare ka tirsan Machadka Heritage

**Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda**

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.

Bogga hore: Doonni sidda tahriibayaal oo ku qallibantay xeebta Liibiya. Xuquuqda sawirka: @Reuters

Xuquuqda © Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

Qoraalka waxaa lagu faafiyey hannaanka Oggolaanshaha Creative Commons Ganacsi iyo macaash looma isticmaali karo https://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/

Kala soo bax qoraalka bogga www.heritageinstitute.org

# Tusmo

Nuxurka Qoraalka ........ 1
Hordhac ........ 2
Habka Cilmibaarista Loo Sameeyey ........ 4
Waxyaabaha xaddiday cilmibaarista ........ 6
Qeexitaanka Tahriibka ........ 7
Heerka uu Gaarsiisan Yahay Tahriibka ........ 7
Sababaha Keena Tahriibka ........ 9
Shaqo la'aan iyo Culeysyo Dhaqaale ........ 9
Sarraynta Qabiilka ........ 11
Daljoogta iyo Qurbajoogta ........ 12
Shaqooyinka Qaar oo Laga Faano ........ 14
Tayada Waxbarashada ........ 14
Tiknolojiyadda iyo Saameynta Dhalinyarada ........ 16
Amniga ........ 18
Shabakado Dadka Tahriibiya ........ 19
Rajada oo Hooseysa iyo Maamullo Tabaryar ........ 19
Sababo Kale ........ 20
Dalalka Loo Tahriibo iyo Sida Lagu Gaaro ........ 20
Fududeynta iyo Kharashka ........ 23
Caqabadaha Lala Kulmo Xilliga Tahriibka ........ 26
Tahriibka Kadib ........ 27
Waxtarka Qoysaska Laga Tahriibay ........ 28
Fursadaha Yar ee Dalka Ka Jira ........ 29
Waxyaabaha Laga Gaabiyay ........ 31
Gunaanad ........ 32
Talooyin tixgelin mudan ........ 32

## Nuxurka Qoraalka

Mid kamid ah natiijada ka dhalatay dagaalkii sokeeye ee Soomaaliya waa barakaca baahsan ee Soomaalida. Tan iyo 1990-kii, boqollaal kun oo muhaajiriin Soomaali ah ayaa tallaabtay xadka una cararay dalalka deriska, Afrika, Bariga Dhexe, Yurub, iyo Waqooyiga Ameerika. Sanad kasta waxa ay Soomaalidu ugu safraan dalal kale farsamooyin kala duwan, oo uu ka mid yahay tahriibka oo lagu fasiri karo safar qarda-jeex iyo qar-iska tuurnimana ay la socoto, iyaga oo sii dhex mara dalal badan inkasta oo tirada tahriibka gasha sanadba sanadka kale uu ka duwan yahay. Dhalinyarada Soomaaliyeed, gaar ahaan ragga, ayaa nasiib darro, qeyb weyn ka ah safarkaas khatarta badan ee tahriibka.

Xog uruurin laga sameeyay 2,685 qof, 31 wareysiyo qoto-dheer iyo 14 dood wadaag ayaan ka samaynay toddobo magaalo oo kala ah Kismaayo, Baydhabo, Muqdisho, Gaalkacyo (koonfurta), Beledweyne, Boosaaso, iyo Burco. Cilmibaaristan waxa aan ku ogaannay in sababta ugu weyn ee keenta tahriibka ay tahay shaqo la'aanta haysata dhalinyarada. Sababaha kale ee tahriibka keena ee aan ku ogaannay daraasaddan waxa kamid ah:

- Xaaladda dhaqaale oo liidata
- Waxbarashada oo aan tayeysneyn
- Saameynta dhalinyarada kale
- Amni xumida ka jirta qaybo kamid ah dalka
- Shabakado wax tahriibiya oo abaabulan
- Iyo rajo xumo ka dhalatay maamullada heer qaran iyo heer gobol oo itaalkoodu yar yahay

Dadka aan waraysannay, in ka badan kala bar (68 boqolkiiba), ayaa ku jawaabtay in tahriibku aad ugu badan yahay (34 boqolkiiba) ama ku badan yahay (34 boqolkiiba) magaalooyinkooda. Yurub ayaa ah meelaha loogu tahriibka badan yahay. In ka badan kala bar (54 boqolkiiba) dadka xog uruurintan laga sameeyay ayaa sheegay in xubno ka tirsan qoyskooda ay u tahriibeen Yurub. Magaalada Baydhabo waxaa saddex meelood meel (32 boqolkiiba) dadku sheegeen in xubno qoyskooda ah ay u tahriibeen Sacuudiga sababtoo ah – sida uu inoo sheegay qof kaqayb galay dood wadaag – "lacagta lagu tago way yar tahay, khatarteedu aad uma sarreyso, muddo yar ayaana lagu gaari karaa." Dhalinyaro badan oo Beledweyne, Muqdisho iyo Kismaayo ka tahriiba ayaa u safra Koonfur Afrika iyo dalal kale oo Afrika ku yaalla, iyada oo uu Mareykanku yahay hiigsigooda ugu danbeeya. Cilmibaarista waxa ay sidoo kale ogaatay in dadka tahriiba ay u badan yihiin rag. Joqraafi ahaan magaalooyinka halka ay ku yaallaan ayaa saameyn xooggan ku leh meelaha laga tahriibo iyo dalalka lasii maro.

Shabakado wax-tahriibiya oo dalka iyo dibaddaba jooga ayaa fududeeya tahriibka, balse waalidiinta iyo qoysasku waxa ay qeyb ka qaataan bixinta kharashka ku baxa tahriibka oo ay ku jirto madaxfurasho. Si loo gaaro Yurub iyo Mareyykanka, waxa ay u baahan tahay maalgelin culus. Inta badan dadkii aan wareysannay waxa ay qiyaaseen

in tahriibka Yurub uu u baahan yahay lacag u dhexeysa US$10,000 ilaa US$20,000. Kaddib marka ay tahriibayaasha Soomaalidu gaaraan Liibiya ama Yemen, dallaaleyda fududaysa tahriibka ayaa lasoo xiriira waalidiinta waxa ayna ka dalbadaan madax furasho. Waalidiin badan ayaa iibiya hantidooda ama lacago kasoo uruuriya qoyskooda, qaraabada iyo saaxiibbada. Magafe (tahriibiyaha madaxfurashada qaata) lacagtiisa ma ahan mid laga gorgortamo.

Halka natiijo ee wanaagsan ee tahriibka guuleysta uu leeyahay waa in qoyska lacago loo soo diro. Qurbajoog badan oo ay ku jiraan tahriibayaal ayaa si joogto ah lacago ugu soo dira qoysaskooda dalka ku nool, waxaana lacagahaasi sanadkii ay gaarayaan ilaa US$1.4 bilyan. Maaddaama dibad-aadiddu faa'idadan leedahay, dhalinyaro badan oo Soomaali ah ayaa tahriiba ama qorsheynaya in ay tahriibaan.

Fursadaha yaalla dalka oo yar iyo nolosha wanaagsan oo laga filayo in ay suuragal ka tahay dibadda haddii la safro, ayaa ku dhiirri-gelineysa dhallinyarada Soomaaliyeed in ay qaataan go'aanka tahriibka. Dadaallada lagu yareynayo tahriibka ayaa ah kuwo aan muuqan. Cilmibaaristan waxa ay ku talinaysaa in la abuuro fursado shaqo iyo waxbarasho, wacyigelin, hagaajinta amniga, xoojinta ilaalada xuduudaha, tayeynta hay'adaha dowladda, iyo abuurista jawi nololeed oo wanaagsan. Dadaalladan oo isbiirsaday waxa ay yareyn karaan tahriibka dhalinyarada Soomaaliyeed.

## Hordhac

Kadib markii ay Soomaaliya xornimada ka qaadatay Talyaaniga iyo Ingiriiska, dowladdii ugu horreysay oo ay ku midoobeen gobolladdii waqooyi iyo koonfur ayaa la dhisay bishii Juulaay sanadkii 1960-kii. Dowladihii rayidka ahaa ee talada qabtay waxa ay wajaheen caqabado badan oo ay kamid ahaayeen kuwo siyaasadeed, dhaqaale, aqoon yari, iyo musuqmaasuq. Muddo ka yar toban sano kaddib xornimadii, waxaa la dilay Madaxweyne Cabdirashiid Cali Sharmaarke. Ciidamo militari ah ayaana taladii inqilaab kula wareegay sanadkii 1969-kii.

Bilowgii hore waxa uu militariga horumarro wanaagsan ka sameeyay qeybo kala duwan oo ay kamid ahaayeen ololihii baahsanaa ee kor loogu qaadayay barashada akhriska iyo qoraalka Af Soomaaliga iyo dhisidda kaabayaasha dalka. sikastaba ha ahaatee, doonidda hogaamiyayaasha Soomaalida ee ahaa in ay mideeyaan dhammaan deegaannada Soomaalidu degto ee Geeska Afrika waxa ay keentay in uu qarxo dagaalkii Soomaaliya iyo Itoobiya dhex maray sanadkii 1977-dii. Ciidamada Soomaaliya waa laga guuleystay kaddib markii Midowgii Soofiyeeti uu la saftay Itoobiya. Dagaalkan waxa ka dhashay in qaxooti badan kasoo qaxaan deegaanka Soomaalidu degto ee Itoobiya una soo hayaamaan Soomaaliya.[1]

[1] Joakim Gundel, "The Migration-Development Nexus: Somalia Case Study", *Centre for Development Research*, Copenhagen, Denmark, International Migration Vol. 40 (5) (2002): 257-264.

Guuldarradan waxa ay noqotay billowgii burburka hay'adaha dowliga ah ee Soomaaliya sanadihii 1980-aadkii. Bartamihii sanadkii 1988-dii, dhaqdhaqaaqii la magic baxay Dhaqdhaqaaqa Wadaniga ee Soomaaliya (SNM) ayaa duullaan ku qaaday taliska xukuumaddii Siyaad Barre ee magaalooyinka Hargeysa iyo Burco. Jawaabta dowladdii militariga waxa ay noqotay burburinta Hargeysa iyo dilka kumannaan muwaadin. Duqeyntaasi waxa ay sababtay in ka badan 600,000 oo Soomaali ah in ay u qaxaan Itoobiya.[2] Bishii Janaayo ee sanadkii 1991, jabhadda USC ayaa Muqdisho la wareegtay xukunkii militariga ahaana tuurtay.

Dagaalladdii sokeeye iyo dowladdii dhexe oo meesha ka baxday waxa ka dhashay in xaaladda Soomaaliya sii xumaato. Dagaalladii qaraaraa ee u dhexeeyay beelihii dagaallamayay waxa ay sababeen dhimashada dad badan, burbur, iyo barakac aad u baahsan. Boqollaal kun oo Soomaali ah ayaa ku khasbanaaday in ay naftooda la cararaan, dalalka deriska ahna qaxooti ku noqdaan. Soomaali badan ayaa safarkooda sii watay una hayaamay dalalka Afrika, Bariga Dhexe, Yurub iyo Waqooyiga Ameerika. Inkastoo qulqulka Soomaalida sanadba sanadka kale ka duwanaa, haddana sanad kasta Soomaali ayaa u tahriibta dunida inteeda kale.

Tahriibka waxa ugu badan dhalinyaro. Sababaha ugu weyn ee ku xambaara dhalinyarada in ay tahriibaan ayaa ah arrimo amni, colaado, dhaqaale xumi iyo arrimo bulsho. Inkastoo xaalad amni oo laysku halleyn karo ay ka jirto deegaanno ay ka mid yihiin Soomaaliland iyo Puntland, haddana saboolnimo baahsan ayaa ka jirta, fursadaha waxbarasho iyo shaqo oo markoodii horeba yaraanna, si cadaalad ah looma wada helo. Shaqo iyo fursad la'aanta waa dhibaatooyin guud ee ka jira miyiga iyo magaalooyinka. Taasna waxaa ka dhashay kooxo abaabulan oo tahriibiya dadka iyo shabakado fududeeya islamarkaana dhiirri-geliya tahriibka dhalinyarada.

Balse nasiib darro, qaar badan oo dhalinyaradaasi kamid ah, ma gaaraan halkii ay doonayeen, inta badanna waxa ay u dhintaan baahi iyo harraad ama doomaha ay ku tahriibaan ayaa kula quusa Badda Mediterranean, Khaliijka Cadan ama Badda Madow. Yurub ayaa ah meesha ugu badan ee loo tahriibo. Soomaalida qaar waxa ay u tahriibaan Mareykanka iyaga oo sii mara dalalka Latin America, islamarkaana isticmaalaya waddooyin kala duwan oo ay kusii dhex maraan dalalkaasi. Si lamid ah tahriibayaasha kale, tahriibayaasha Soomaalida waxa ay wajahaan jirdil, kufsi, dhac, iyo xabsi aan sharci ahayn. Inta badan kooxo abaabulan ayaa afduubta tahriibayaasha kuwaas oo madaxfurasho ka dalbada qoysaskooda.

Doodo iyo wacyigelinno ku aaddan kaalinta dhalinyarada ee arrimaha bulshada, dhaqaalaha iyo siyaasadda ayaa kusoo kordhayay Soomaaliya. Sidoo kale, qurbajoogta soo laabanaysa ayaa ka qeyb qaadanaya howlaha hay'adaha dowladda

[2] Ibid.

iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay. Balse dib-usoo-celinta qaxootiga Soomaalida ee Kenya iyo go'aanka dalkaas uu ku xirayo Dhadhaab oo ah xerada qaxooti ee ugu weyn dunida[3], iyo sidoo kale boqollaalka Soomaalida ah ee lagasoo celinayo Mareykanka, waxa ay sii kordhin kartaa shaqo la'aanta iyo tahriibka.

Inkastoo dib-usoo-celinta Soomaalida ay culeys tahay, haddana qurbajoogta soo laabaneysa, dadaallada dowlad-dhisidda iyo xasilinta, maalgashiga ganacsiga oo si tartiib-tartiib ah u kobcaya, iyo helitaanka adeegyada waxbarasho iyo caafimaad oo soo hagaagaya ayaa ah ifafaalooyin wanaagsan oo yareyn kara tahriibka baahsan ee dhalinyarada.

Iyada oo la eegayo waxyaabahan, waxa aan bilownay cilmibaaristan iyadoo ay ujeedadeennu tahay in aan fahamno caqabadaha dhaqaale iyo amni oo ay wajahayaan dhalinyada Soomaaliyeed ee tahriibaya. Waxa aan sameynay cilmibaaristan si aan sharraxaad uga bixinno sababa keena tahriibka Soomaaliya, sidoo kalena usoo jeedinno talooyin waxtar u leh siyaasadaha iyo mashaariicda lagu xallinayo tahriibka.

## Habka Cilmibaarista Loo Sameeyey

Cilmibaaristan waxa ay baaritaan ku sameysay tahriibka Soomaaliya. Diiradda waxa la saaray fahamka sababaha ugu waaweyn ee ku xambaara dhalinyarada Soomaaliyeed in ay tahriibaan iyo sidoo kale sida tahriibka loo fududeeyo, natiijada ka dhalata iyo tallaabooyinka ay tahay in la qaado si loola tacaalo sababaha keena tahriibka.

Cilmibaarista waxa laga sameeyay toddobo magaalo oo joqraafi ahaan meelo kala duwan ku yaalla shacab badanna ku nool yihiin kuwaasoo kala ah Kismaayo, Baydhabo, Muqdisho, Gaalkacyo (koonfurta), Beledweyne, Boosaaso, iyo Burco. Magaalooyinkan waxa ay hoos tagaan maamullo kala duwan oo kala ah Puntland, Galmudug, HirShabeelle, Maamulka Gobolka Benaadir, Koonfur Galbeed, Jubaland iyo Burco ee hoos tagta jamhuuriyadda iskeed isku magacowday ee Soomaaliland. Cilmibaarayaasha Machadka Heritage ayaa u safray magaalooyinkan waxa ayna soo uruuriyeen xogta muddadii u dhexeysay 22 Juulaay iyo 25 Oktoobar sanadkii 2016. Cilmibaarayaasha waxa ay isticmaaleen hab isku dhafan: xog uruurin, wareysiyo dad xog-ogaal ah, dood wadaag koox kaqeyb gashay, iyo darsidda cilmi-baarisyada laga qoray arrimaha tahriibka.

Magaalooyinka ka baxsan Muqdisho, Machadka Heritage waxa uu la kaashaday lix jaamacadood iyo machad cilmibaaris

[3] BBC (2015), "Kenya's Deputy President William Ruto has called on the United Nations to close the Dadaab refugee camp and relocate more than 500,000 Somalis", 11 April. Available at: http://www.bbc.com/news/world-africa-32269944

kuwaas oo kala ah: Jaamacadda Kismaayo ee ku taalla Kismaayo, Jaamacadda Koonfurta Soomaaliya ee ku taalla Baydhabo, Jaamacadda Gaalkacyo ee ku taalla koonfurta Gaalkacyo, Jaamacadda Boosaaso ee ku taalla Boosaaso, Jaamacadda Hiiraan ee ku taalla Beledweyne, iyo Xarunta Latalinta iyo Cilmibaarista ee fadhigeedu yahay Burco. Jaamacadahan waxa ay soo xuleen cilmibaarayaasha xog uruurinta dadweynaha sameeyay, waxa ayna casumeen dadka xog-ogaalka ah ee aan wareysannay iyo dadka kale ee ka qeyb qaatay dood wadaagga.

Ilaa 31 wareysi ayaa lala yeeshay dad xog-ogaal ah ee ku kala nool toddobada magaalo. Wareysiyada waxaa qeyb ka ahaa dhalinyaro horey u tahriibtay ama uu tahriib ka fashilmay, waaliddiin, mas’uuliyiin heer federaal iyo heer maamul goboleed, ganacsato iyo hay’adaha aan macaash-doonka ahayn ee ka shaqeeya arrimaha dhalinyarada. Sidoo kale 14 dood- wadaag ayaa la sameeyay. Labo dood wadaag ayaa laga sameeyay magaalo kasta. Magaalo kasta, dhalinyaro isugu jira rag iyo dumar ayaa lagu casuumay mid kamid ah dood-wadaagyada, waxa ayna ka hadleen aragtiyadooda ku aaddan tahriibka. Ganacsato iyo hay’ado, maamullada degaanada, waaliddiin iyo aqoonyahanno ayaa sidoo kale ka qeyb qaatay dood wadaag kale ee lagu faaqidayay fursadaha shaqo iyo waxbarasho ee ka jira magaalooyinka, kaalinta waalidiinta, iyo siyaabaha loo xallin karo tahriibka. Guud ahaan 125 qof ayaa ka qayb qaadatay wareysiyada iyo dood wadaagyada. Cilmibaarayaasha Machadka Heritage ayaa sameeyay dhammaan wareysiyada, waxa ayna sidoo kale xiriiriyeen dood-wadaagyada.

Dad gaaraya ilaa 2,685 qofood ayaa sidoo kale aragti uruurin laga sameeyay toddobada magaalo; 516 waxa ay ku sugnaayeen Muqdisho; 360 waxa ay joogeen Kismaayo; 363 waxa ay deggenaayeen Baydhabo; 362 waxa ay ku noolaayeen koonfurta Gaalkacyo; 361 waxa ay ahaayeen reer Boosaaso; 360 waxa ay joogeen Burco; 363-na Beledweyne ayay ku sugnaayeen. Ilaa afartan iyo labo cilmibaarayaal la tababaray ayaa soo wareystay dadka iyaga oo isticmaalaya qalab elektroonik ah, waxa ayna xog uruurinta ka socotay magaalo kasta saddex maalmood oo xiriir ah marka laga reebo Muqdisho oo afar maalin oo xiriir ah ay daraasadda wadeen cilmibaarayaashu.

Inta ay socotay xog uruurinta, magaalooyinka waxa loo qeybiyay xaafado, cilmibaarayaashana waxa loo diray in ay xaafado gaar ah xog uruurinta ka sameeyaan maalin waliba, iyada oo ay kormeerayeen cilmibaarayaasha Machadka Heritage. Dadka aragti uruurinta lala sameynayay waxa loosoo xulayay si nasiib ah, hal qof oo ay da’diisu ka weyn tahay 18 sano ayaa laga wareysanayay shantii guriba. Muqdisho waa ay ka duwaneyd. Maadaama gobolka Benaadir uu ka kooban yahay 17 degmo, xog uruurinta waxa laga sameeyay dhammaan degmooyinka. Mid kamid afarta

waax ee degmo kasta leedahay ayaa si nasiib ah loo doortay, 30 qof oo deegaanka ah ayaana waaxdaas laga wareystay.

In ka badan kala bar (59 boqolkooba) dadka noo jawaabay waxa ay ahaayeen rag, halka 41 boqolkiiba ay ahaayeen dumar. In ka badan afar meelood saddex meel dadka la wareystay (82 boqolkiiba) waxa ay da’dooda ka hooseysay 45 sano; 47 boqolkiiba waxa ay da’dooda u dhexeysay 18 ilaa 30 sano; 35 boqolkiiba waxa ay da’dooda u dhexeysay 31 ilaa 45 sano; 15 boqolkiiba waxa ay da’dooda u dhexeysay 46 ilaa 60 sano; 3 boqolkiiba ayaa da’doodu ka weyneyd 61 sano.

Marka la eego dhinaca waxbarashada, 26.9 boqolkiiba dadka aan xog uruurinta ka sameynay ma soo marin nidaam waxbarasho oo rasmi ah. Tiro wax yar ka badan kala bar (51.5 boqolkiiba) ayaa dhigatay iskuul hoose ilaa dhexe (22.9 boqolkiiba) halka 28.6 boqolkiiba ay dhigteen iskuul sare. Sidoo kale 21.6 boqolkiiba ayaa dhigatay jaamacad. Inta badan dadka noo jawaabay (36 boqolkiiba) waxa ay ahaayeen shaqo la’aan, halka 15 boqolkiiba ay ka shaqeynayeen ganacsiyada gaarka loo leeyahay. 17% waxa ay ahaayeen arday. Tiro isla eg oo ah 9% ayaa la shaqeynayay dowladda iyo hay’adaha aan macaash-doonka ahayn, halka 14 boqolkiiba ay sheegeen in ay qabtaan shaqooyin aysan tilmaamin nooca ay yihiin.

## Waxyaabaha xaddiday cilmibaarista

Inkasta oo cilmibaaristan ay soo bandhigeyso xog ballaaran ee habab kala duwan sida aragti uruurin, wareysiyo qoto-dheer iyo dood-wadaagyo lagusoo uruuriyay, haddana waxa jira dhowr arrin oo xaddideysa daraasaddan.

Kow, ma aanan awoodin in aan daraasaddan ka sameyno 18-ka gobol ee Soomaaliya. Daraasaddan waxa ay ku koobneyd toddobo magaalo. Magaalooyin kale oo aad muhiim u ah, islamarkaana tahriibku ku badan yahay qeyb kama ahayn sababo la xiriira wakhtiga la heystay oo yaraa, iyo caqabado maaliyadeed iyo kuwo amni awgood. Sidaas darteed, inkasta oo cilmibaaristan ay faham waafi ah ka bixineyso tahriibka Soomaaliya, natiijada daraasaddan waxa ay ku kooban tahay aragtiyada dadkii fikrad uruurinta laga sameeyay, kuwa la wareystay iyo kuwa ka qeyb qaatay dood wadaagyada la sameeyay muddada aan kor kusoo xusnay mana ka turjumeyso Soomaaliya oo dhan.

Tan labaad, aragti uruurinta waxa lagu sameeyay taleefannada casriga ah. Inkasta oo cilmibaarayaasha la siiyay tababar ku filan ee la xiriira habka xog uruurinta loo sameynayo, haddana isticmaalka taleefannada si xog loo soo uruuriyo, waxa ay ku cusbeyd qaar kamid ah cilmibaarayaasha. Taasina waxa ka dhashay in su’aalaha qaar aanan si buuxda looga jawaabin.

Sidoo kale, jaamacadaha aan iskaashannay ayaa soo xulay cilmibaarayaasha aan tababarnay. Qaar kamid ah ma lahayn khibrad hore ee la xiriirta in aragti uruurin loo sameeyo cilmibaaris. Tanina waxa ay saameyn ku yeelan kartaa tayada xogta lasoo uruuriyay.

Ugu danbeyn, waxa aan cilmibaaristan sameynay dabayaaqadii sanadkii 2016 taasoo micnaheedu yahay in xogta lasoo ruuuriyay ay dib dhacday maadaama 2018 la daabacay.

## Qeexitaanka Tahriibka

Hijrada ama socdaalka dibadda lagu aado waxa lagu qeexaa in ay dad ka tagaan halkii ay ku noolaayeen una hayaamaan meel kale iyaga oo ay ujeedadoodu tahay in ay deegaanka beddeshaan. [4] Qeexitaankan waxa uu tilmaamayaa in dibad-u-dhoofka, oo tahriibku ka mid yahay, uu leeyahay labo sifo oo kala ah in xuduudda laga tallaabo iyo in deegaanka la beddesho.[5]

Sida aan horay u xusnay, tahriib waa eray caan ah oo ay Soomaalidu aad u isticmaasho. Waxa loo adeegsadaa safarka dhallinyaradu ku dhoofto oo khatarta badan, sida safarada ay ku doonaan in ay Yurub gaaraan iyaga oo sii maraya meelo kale sida Itoobiya, Suudaan, iyo Liibiya [6] ama kuwa u tahriibka Sacuudiga iyo Koonfurta Afrika iyada oo ay maraan Badda Cas iyo dalal Afrikaan ah. Sidaas si ka duwan, tahriibka dhinaca cirka ah ee dukumintiyo iyo warqado safar la isticmaalo waxa inta badan loo yaqaannaa dhoof.[7]

Warbixintan waxa ay erayga tahriib u isticmaalaysaa dhammaan hababka kala duwan ee sharci darrada ah ee la adeegsado si Soomaaliya looga safro loona gaaro dalal kale. Dhammaan noocyada tahriibka, sida loo fududeeyo, sababaha keena, natiijada ka dhalata, iyo siyaabaha loo xallin karo ayaa la faaqiday.

## Heerka uu Gaarsiisan Yahay Tahriibka

Si loo fahmo aragtida dadka xog uruurinta laga sameeyay ee ku aaddan heerka uu gaarsiisan yahay tahriibku, dadka la wareystay waxa la weydiiyay in tahriibku uu ku badan yahay ama ku yar yahay magaaladooda marka la barbar dhigo magaalooyinka kale. In ka badan, kala bar (68 boqolkiiba) ayaa ku jawaabtay in tahriibku aad ugu sarreeyo magaalooyinkooda, (34 boqolkiiba) ama uu ku sarreeyo (34 boqolkiiba). Dhinaca kale, 32 boqolkiiba ayaa rumeysneyd in tahriibku uu yar yahay (24 boqolkiiba) ama uu aad u yar yahay (8 boqolkiiba). Tirada aadka u badan ee ku jawaabtay in tahriibku sarreeyo

[4] Kyaing Kyaing Thet, "Pull and Push Factors of Migration: A Case Study in the Urban Area of Monywa Township, Myanmar", *World of Statistics*, P. 2.

[5] Pieter Kok, "The Definition of Migration and Its Application: Making Sense of Recent South African Census and Survey Data", *South Africa Journal of Demography*, 7 (1) (1999): P. 19.

[6] NiMo-Ilhan Ali, "Going on Tahriib: The causes and consequences of Somali youth migration to Europe", *Rift Valley Institute*, 30 (9) (2016): P. 12-13.

[7] Ibid.

waxa ay muujineysaa in dadaallada nabadeynta, dowlad dhisidda iyo horumarinta aanay ku guuleysanin yareynta tahriibka dhalinyarada Soomaaliyeed.




Iyada oo uu tahriibku sidaasi u sarreeyo, haddana uma saameeyo gobollada Soomaalida si iskumid ah. Magaalooyinka Beledweyne, Burco iyo Boosaaso ayaa ahaa magaalooyinka ay ku noolaayeen dadka ugu badan ee ku jawaabay in tahriibku aad u sarreeyo. Wareysiyada iyo dood wadaagyada aan ka sameynay Burco, Beledweyne iyo Boosaaso waxa ay waafaqsanaayeen natiijada xog uruurinta. Inkasta oo nabad la isku halleyn karo ay ka jirto Soomaaliland iyo Puntland, dadka aan wareysannay waxa ay sheegeen in tahriibku aad ugu badan yahay.

Magaalooyinka Baydhabo, Muqdisho, Gaalkacyo iyo Kismaayo waxa ay dadka aan wareysannay rumeysnaayeen in tahriibka aanu magaalooyinkooda ku badneyn inkasta oo ay magaalooyinkan ku yaallaan deegaanno aanu ammaankoodu fiicneyn. Dad badan waxa ay aaminsan yihiin in magaalada Muqdisho tahay halka loogu tahriibka badan yahay. Balse heerka tahriibka Muqdisho waxa uu ka yaraa magaalooyin ku yaalla Soomaaliland iyo Puntland sida ay natiijada cilmibaarista muujineyso. Magaalada Kismaayo waxa ay dad badan ee aan ka wareysannay muujiyeen in tahriibku aanu caqabad muuqato ka ahayn magaalada. Magaalooyinka Gaalkacyo iyo Baydhabo waxa kasoo baxday natiijo isku dhafan. Inkastoo ay dhalinyaro badan ka tahriibeen, haddana tahriibku kama ahayn caqabad weyn. Natiijadan waxa ay burineysaaa arigtida ah in amni xumidu tahay sababta ugu weyn ee Soomaaliya looga tahriibo. Dadka aan ka wareysannay Beledweyne ayaa ahaa kuwa kaliya ee sheegay in amni darradu ahayd sababta ugu weyn oo ay u tahriibaan.

Natiijo kale oo xiiso badan waxa ay kasoo baxday su’aal ahayd in xubno kamid ah qoysaska dadka cilmibaaristan lagu wareystay ay tahriibeen. In ka badan kala bar (55 boqolkiiba) dadka aan xog uruurinta ka sameynay waxa ay sheegeen in qoyskooda qof kamid ah uu tahriibay. 45 boqolkiiba xubin qoyskooda kamid ah ma tahriibin. Magaalooyinka Beledweyne iyo Burco ayaa ahaa kuwa ugu badan dadka aan wareysannay oo ay xubnaha qoyskooda horey u tahriibeen. Dadka aan ka wareysannay Baydhabo, Muqdisho, Boosaaso, Gaalkacyo, iyo Kismaayo waxa sidoo kale waxa ku jiray dad xubno qoyskooda kamid ah tahriibeen.

Wiilasha ayaa laba jibbaar ka badnaa hablaha tahriiba. Tiro aad u badan (72 boqolkiiba) tahriibayaasha qoysaska dadka aan wareysannay waxa ay ahaayeen wiilal. 28 boqolkiiba ayaa sidoo kale ahaa gabdho. Tani waa mid la fahmi karo marka la eego khatarta iyo duruufaha ku xeeran tahriibka. Magaalada Burco ayaa ahayd magaalada dumarka ugu badan ka tahriibeen marka la barbar dhigo magaalooyinka kale, balse wali ragga ka tahriiba Burco ayaa ka badnaa dumarka. Arrinkan waxa lagu fasiri karaa in ay calaamad u tahay sida dhalinyarada, rag iyo dumarba, rajo beel u yihiin iyo fursad yarida ka jirta magaalada.

## Sababaha Keena Tahriibka

Waxaa jira dhowr arrimood oo sabab u ah tahriibka Soomaalida. Waxa kamid ah arrimo dhaqaale, kuwo siyaasadeed iyo kuwo bulsho. Natiijada cilmibaaristan waxa ay muujineysaa in sababaha keena tahriibka ay ka mid yihiin shaqo la'aan iyo dhibaatooyin dhaqaale, waxbarashada oo ay tayadeedu liidato, aaladaha tiknoolojiyadda oo isticmaalkooda batay iyo saameynta (hiyi-kicinta) saaxiibbada, amni-darada, shabakado dadka tahriibiya oo xoog leh, iyo rajo xumo laga qabo maamullada dalka. Waxyaabaha kale ee ku xambaara Soomaalida in ay tahriibaan waxa kamid ah wacyigelin ku filan ee la xiriirta khatarta tahriibka oo aan jirin, heyb sooc, iyo xarumo madadaallo oo aanan jirin.

### Shaqo la'aan iyo Culeysyo Dhaqaale

Markii la weydiiyay sababaha ugu waaweyn ee keena tahriibka, tiro aad u badan (69 boqolkiiba) ayaa ku jawaabay fursad la'aan iyo dhaqaalo xumo, kuwaas oo u sii kala baxayey, 48 boqolkiiba tilmaamay shaqo la'aan iyo 21 boqolkiiba farta ku fiiqay dhaqaale xumo. 31 boqolkiiba ayaa sidoo kale sababaha tahriibka ku qeexay amni darro, waxbarasho tayo leh oo aan jirin, iyo saameynta dhalinyarada kale. Natiijooyinka cilmibaaristan waxa ay muujinayaan baahida loo qabo fursado in la abuuro.

Dadka ku jawaabay in shaqo la'aantu ay tahay sababta ugu weyn ee loo tahriibo, magaalooyinka Muqdisho (21 boqolkiiba), Burco (20 boqolkiiba) iyo Boosaaso (18 boqolkiiba) ayaa ugu sarreeyay marka la barbar dhigo magaalooyinka kale sida Gaalkacyo (13 boqolkiiba), Baydhabo (13 boqolkiiba), Kismaayo (8 boqolkiiba) iyo Beledweyne (7 boqolkiiba). Natiijadan waxaa lagala soo dhex bixi karaa in sababta ugu weyn ee looga tahriibo Soomaaliland iyo Puntland, oo iyagu heysta amni ka fiican magaalooyinka ku yaalla koonfurta, in ay tahay fursadaha shaqo oo ku yar dhalinyarada.

Intaas waxaa dheer, tahriibayaal badan ayaa kasoo jeeda qoysas sabool ah, waxa ayna u tahriibaan si ay u caawiyaan qoysaskooda. Si nolol meel-dhexaad ah ay ugu noolaadaan, waalidiinta qaar ayaa ku fikira in tahriibku dhaqaale ahaan u wanaagsan yahay qoyska. Maadaama shaqo la'aantu badan tahay, dhaqaale xumina ay

jirto, mid kamid ah ka qeyb galayaasha dood-wadaag ayaa ku dooday in dhalinyaradu ay door bidayaan in ay badda ama saxaraha ku dhintaan si ay u gaaraan Yurub intii ay guryaha iska fadhin lahaayeen iyagoo camal la'aan ah. Qoysaska qaar ma awoodaan in ay lacagta iskuulka lagu dhigto ka bixiyaan caruurtooda. Sidaas darteed, dhalinyaro badan ayaa aaminsan in tahriibku yahay qaab ay qoysaskooda dhibaatooyinka dhaqaale uga saari karaan. Wiil dhalinyaro ah ee aan ku wareysannay Gaalkacyo ayaa sharraxaad ka bixiyay sababta uu rabay in uu u tahriibo. Waxaa uu yiri, "waxa aan isku dayay in aan tahriibo, sababtoo ah waxa aan rabay in aan caawiyo nafteyda iyo qoyskeyga."

Shaqada iyo in qoysasku ay helaan nolol maalmeed, waa ay isku xiran yihiin. Tusaale ahaan, haddii qoys ka kooban shan qof uu hal qof kaliya ka shaqeeyo, inta kale ee qoyska waxa ay dareemayaan cadaadis badan maaddaama dhammaantood ay ku tiirsan yihiin hal qof oo shaqeeya. Haddii labo ama saddex qof qoyskaasi u shaqeyneyso, cadaadiska wuu yar yahay. Sidaas darteed, shaqo abuurka waxa uu keenayaa in ay nolol fiican ku noolaadaan qoysaska. Inkastoo dowladda dhexe iyo maamullada dalka aanay fursad shaqo u abuuri karin dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed, haddana si loo yareeyo tahriibka sii kordhaya waxa lagama maarmaan ah in fursado loo abuuro dhalinyarada.

Tan iyo burburkii dowladdii dhexe ee sanadkii 1991, shaqo la'aanta aad ayay u sarreysay. Sida lagu xusay Halbeegga Horumarka Bini'aadamka ee Barnaamijka Horumarinta Qaramada Midoobay ee la daabacay sanadkii 2012, boqolkiiba 67dhalinyarada Soomaaliyeed oo ay da'doodu u dhexeyso 14 ilaa 29 sano waxa ay ahaayeen shaqo la'aan. "Dumarka ayaa shaqo la'aantoodu ahayd 74 boqolkiiba waxa ayna ka sarreysay ragga oo ay shaqa la'aantoodu ahayd 61 boqolkiiba."[8] Tanina waxa ay micnaheedu tahay in Soomaaliya ay tahay mid kamid ah dalalka ugu shaqo la'aanta badan dunida. Dowladda, hay'adaha gaarka loo leeyahay iyo ganacsatada waxa ay abuuraan fursado. Balse fursadahan aad ayay u yar yihiin marka la barbar dhigo tirada dadka shaqo la'aanta ah.

Hal sabab ee ka qayb qaadanaya shaqo la'aanta sii xumaaneysa, waa kororka ardayda ka qalin jebineysa dugsiyada sare iyo jaamacadaha kuna biiraya suuqa shaqa-la'aanta iyo sidoo kale maamullada dalka oo aanan hayn qorshe caawinaya dhalinyaradan sidii ay shaqo u heli lahaayeen.

Magaalada Burco, tusaale ahaan, waxa ay inta badan dadkii aan ka wareysannay noo sheegeen in tahriibku ku badan yahay Burco marka la barbar dhigo Hargeysa, sababta oo ah fursadaha yaalla Hargeysa ayaa ka badan kuwa ka jira Burco. Sidaas oo kale, fursadaha dhalinyarada dhameysay jaamacadaha ee ku nool Boosaaso aad ayay

[8] United Nations Development Programme (UNDP), "Somalia Human Development Report: Empowering Youth for Peace and Development", (2012).

u yar yihiin. Mid kamid ah dhalinyarada jaamacadaha dhameeyay ayaa cabbiray xaaladda shaqo ee magaalada. Waxa uu yiri, “waxaan arkay shirkad xayeysiisay lix shaqo. In ka badan 500 tartame ayaa soo codsaday. 178 qof ayaana noqdeen kuwa laga soo xulay, si loo sii kala saaro.” Sheekooyinkan oo kale waxa ay muujinayaan sida shaqo la’aanta iyo fursad yarida ay xiriir adag ula leeyihiin tahriibka Soomaaliya.

Sida loo shaqaaleysiiyo shaqo doonka ayaa sidoo kale ah mid wax badan ka khaldan yihiin. Inta badan shaqooyinka dowladda, hay’adaha gaarka loo leeyahay iyo ganacsiga si karti iyo aqoon ku salaysan laguma bixiyo. Xulashada ku saleysan qabiilka, oo ay wehliso in la doorbido qurbajoogta, waxa ay u diideysaa dhalinyarada gudaha wax ku baratay in ay shaqo helaan. Soomaalida oo u arka shaqooyinka qaar kuwo aan u qalmin ayaa sidoo kale sii xumeysay, xaaladda shaqo la’aanta.

### Sarraynta Qabiilka

Tan iyo sanadkii 2000, awood qeybsiga Soomaaliya waxa uu ku saleysnaa halbeegga 4.5. Waa hannaan ay afar beelood kuraasta baarlamaanka ka helayaan saamiyo isla’eg, halka kala bar tiradaasina ay helayaan beelo badan oo isku dhafan. Nidaamkaas oo kale ayaa sidoo kale loo qeybiyaa xubnaha golaha wasiirrada iyo xafiisyada kale ee muhiimka ah. Marka la eego heer federaal, nidaamkan waxa uu saameeyay shaqaalaha rayidka ah. Waxana ay tani keentay in dad badani u arkaan in qaabka loo qoro shaqaalaha rayidka uu yahay mid aan cadaalad ahayn, waana mid kamid ah sababaha dhalinyarada qaarkood fursado uga raadiyaan dibadda.

Qabiilka uu shaqo codsaduha ka dhashay saamayn muhiim ah ayuu kuu leeyahay in uu qofkaasi shaqo helo iyo in kale. Dad badan ayaa aaminsan in beelaha lagu abtirsado ay xiriir toos ah la leeyihiin in aad shaqo ka hesho xafiisyada dowladda. Shahaadooyin iyo aqoon oo aanay garab socon qaraabo iyo beelo saameyn leh wax micno ah ma lahan. Mid kamid ah ka qeybgalayaasha dood-wadaag lagu qabtay Burco ayaa waxa uu yiri waxa aad u baahan tahay xildhibaan ama siyaasi saameyn leh si aad shaqo u hesho. In qabiil dadka lagu shaqaaleysiiyo waxa sidoo kale isticmaala shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo hayadaha aan macaashdoonka ahayn. Aqoonta, shahaadada, iyo khibradda waxa ay mararka qaar leeyihiin tixgelinta hooseysa marka ay timaado shaqo qorista. Masuuliyiin badan oo xafiisyo fadhiya, ayuu mid kamid ah dadka la wareystay yiri, waxa ay rumeysan yihiin in shaqo siinta qaraabada ay tahay mas’uuliyad saaran.

Burburkii dowladdii dhexe iyo dagaalladdi beelaha ee xigay ayaa kaalin ka qaatay in qabiil laysku shaqaaleysiiyo. Ganacsade ka qeyb galay dood-wadaag lagu qabtay Muqdisho ayaa sheegay in ganacsatadu aanay qof kasta shaqo siin karin, waxa uuna ku daray “in uu shaqaaleysiiyo Xasan oo ay qaraabo yihiin ayaa hantidiisa badqabkeeda uga fiican in uu shaqaaleysiiyo Cali oo ah

xirfad yaqaan." Inkastoo xaaladdan aanay sax ku ahayn ganacsi kasta, haddana waxa ay muujineysaa kalsooni yarida lagu qabo dadka ka dhashay beelaha kale. Run ahaantii, ma jirin dib-u-heshiisiin dhab ah oo la sameeyay tan iyo burburkii dowladdii militariga, ganacsatadana waxa ay qabaan walwal loo-qaateen ah.

Sikastaba ha noqotee, qaar badan oo aan wareysannay ayaa rumeysnaa in haddii fursadaha shaqada si cadaaad ah lagu helayo, in tahriibku yaraan lahaa. Fursadaha shaqo ee guud ahaan dalka waa ay yar yihiin, maamul xumida fursadihii yaraa ee la heli karayna waxa ay ku xabmaartay dhalinyaro badan ee wax baratay in ay nolol tan dalka dhaanta ka raadsadaan dalal kale.

Dhallinyarada Soomaaliyeed waxa ay sidoo kale cabasho ka muujiyeen itaal darrida dowladda dhexe iyo maamul goboleedyada ee aan awoodin in ay isbeddel ku sameeyaan shaqaalaha rayidka ah islamarkaana shaqada ka ceyriyaan shaqaalaha aanan imaanin xafiisyada. Dadka aan ka wareysannay Muqdisho waxa ay ku celceliyeen in loo baahan yahay in shaqada laga ceyriyo shaqaalaha rayidka ee ka shaqeeya meelaha kale, goobta shaqadana u yimaada kaliya in ay mushaar helaan warqadda xaadiritaankana saxiixaan. Isbeddel dhinaca shaqaalaha rayidka waxa uu fursad siin karaa dhalinyaro aqoonyahanno ah. Laakiin in la beddelo dhaqanka shaqaaleysiinta ee qabiilka ku saleysan ayaa ah mid adag una baahan ku dhiirasho siyaasadeed, sharciyo, hay'ado maamul oo si wanaagsan u shaqeeya iyo hoggaan.

Mudnaan siinta qabiilka ma ahan kaliya dhibaatada dhinaca shaqada ka heysata dhalinyarada Soomaaliyeed. Qurbajoogta soo noqotay ayaa sidoo kale shaqooyinka kula tartama kuna ciriirya dhalinyarada dalka wax ku bartay.

## Daljoogta iyo Qurbajoogta

Toddobadii sano ee lasoo dhaafay, Soomaali badan ayaa dalka dib ugu soo laabtay, kuwaas oo intooda badan ka yimid Yurub iyo Mareykanka. Qurbajoogta soo laabatay waxa ay sanadba sanadka ka danbeeya si muuqata ugu biirayeen laamaha dowladda iyo ganacsiga. Bishii Oktoobar 2013, Wasaaradda Arrimaha Dibadda Soomaaliya waxa ay sameysay Waaxda Arrimaha Qurbajoogta. [9] Wakaaladda Qurbajoogta Soomaaliland ayaa sanadkii 2010 laga yegleelay Soomaaliland. [10] Sidoo kale Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga ee Puntland waxa ay lahayd waaxda qurbajoogta tan iyo sanadkii 2010.[11]

Saameynta qurbajoogta Soomaaliya waxa ay aad uga dhex muuqataa dowladda. Heer federaal marka la eego, madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Farmaajo, Ra'iisul Wasaare Xasan Cali Kheyre, iyo Gudoomiyihii golaha shacabka, Maxamed

[9] Maimuna Mohamud, "Diaspora Return to Somalia: Perceptions and Implications", *Heritage Institute for Policy Studies*, Issue (7), June (2016).
[10] Ibid.
[11] Ibid.

Sheekh Cusmaan 'Jawaari' waxa ay kasoo laabteen dalalka Mareykanka iyo Norway. Sidoo kale 38 boqolkiiba xubnaha golaha shacabka baarlamaanka ayaa ah qurbajoog heysata laba jinsiyadood.[12] Inta badan xubnaha golaha wasiirrada ayaa sidoo kale ah qurbajoog soo laabatay. Agaasimayaasha guud ee wasaaradaha muhiimka ah ee dowladda federaalka iyo shaqaalaha kale ee lataliyayaasha u ah wasaaradaha ayaa iyaguna ah qurbajoog kasoo laabtay intooda badan Yurub iyo Waqooyiga America. Qaar kamid ah madaxweynayaasha, xubnaha baarlamaannada, iyo golayaasha wasiirrada maamul goboleedyada ayaa iyaguna aqoonsiyo muwaadinnimo ka heysta dalalka kale. Hay'adaha caalamiga ah ayaa sidoo kale daneeya in ay shaqooyinka muhiimka ah siiyaan Soomaalida haysata dhalasho kale afafka qalaadna si wanaagsan u yaqaan.

Dadka aan wareysannay waxa ay rumeysnaayeen in dowladda federaalka iyo deeq bixiyayaashu ay daneeyaan qurbajoogta, marka ay timaado shaqaaleysiinta maaddaama ay aqoontoodu wanaagsan tahay una fududdahay in ay safraan. Erayga qurbajoog waxa uu noqday mid qiimo gaar ah leh, waxa uuna abuuray dareen ah in dadka dalka kusoo laabanaya ay fishaan in tixgelin gaar ah la siiyo. Mid kamid ah qurbajoogta soo laabatay oo Muqdisho uga qeyb galay dood-wadaag ayaa sharraxaad ka bixiyay: "qurbajoogta soo laabanaysa waxa ay aaminsan yihiin in ay iyaga kaliya wax yaqaaniin. Waxaa ku jiro qab, dadka dalka ku noolna waa ay aamineen sarreyntaas."

Aragtidan oo ay wehliso saameynta ay qurbajoogta leedahay waxa ay abuurtay dareenka ah in Soomaalida dalka wax ku bartay aanay heysanin fursad lamid ah midda ay heystaan qurbajoogta soo laabaneysa. Sida ay qabaan qaar badan oo kamid ah dhalinyarada dalka wax ku bartay ee aan wareysannay, in aad aqoonsi ka heysato dal ku yaalla Yurub ama Mareykanka waxa ay kugu caawineysaa in aad shaqo hesho. Dhalinyaro badan ayaa tahriibtay si ay aqoonsi dal kale usoo qaataan. Oraahda ah "tahriibayaasha maanta waa qurbajoogta berrito" ayaa muujineysa nuxurka saameynta qurbajoogta. Xaqiiqda ah in qurbajoogtu marka ay soo laabtaan lagu soo dhaweeyo xilal sarsare oo ay ka qabtaan dowladda ama hay'adaha caalamiga ah, ayaa tusaale fiican u ah sida loogu dhiirrigeliyay daljoogta in ay baasaboor labaad soo raadsadaan. In Yurub loo tahriibo kaliya ma ahan in aqoonsi dal Yurub ku yaalla lasoo qaato, waxa uu sidoo kale u furayaa tahriibayaasha albaabada fursadaha dalka.

Arrimaha kale ee muujinaya muhiimadda in baasaboor dal kale ah lasoo qaato waxaa kamid ah in dhalinyaro badan ee wax ku bartay kana shaqeeya Soomaaliya ay ku dadaalaan in ay baasaboorro kasoo qaataan dalalka deriska ah sida Kenya, Itoobiya iyo Jabuuti. Baasaboorkaas labaad waxa uu

[12] Wakiil.org, "38% of Somali MPs, (105 out of 275) have dual citizenship", https://twitter.com/wakiilorg/status/833936520696389633

siinayaa fursad ay safarro caalami ah ku geli karaan iyo sidoo kale fursado shaqo.

Inkasta oo khibradda, aqoonta, iyo maalgashiga qurbajoogta ay muhiim u yihiin dib-u-dhiska Soomaaliya, shaqo la'aanta dhalinyarada dalka wax ku bartay oo sarreysa marka la barbar dhigo qurbajoogta soo laabaneysa waxa ay ku dhiirrigelisay dhalinyaro dalka wax ku bartay in ay tahriibaan. Mid kamid ah dhalinyarada aan Muqdisho ku wareysannay ayaa tilmaamay in heysashada baasaboor aan kan Soomaaliga ahayn ay shardi u tahay qaar kamid ah shaqooyinka dowladda iyo hay'adaha caalamiga ah. In la dhiirrigeliyo in ay fursado isla-eg Soomaalida u helaan shaqooyinka iyo in sare loo qaado qiimaha baasaboorka Soomaaliga waxa ay kaalin ka qaadan kartaa la tacaalidda arrinkan.

### Shaqooyinka Qaar oo Laga Faano

Inkasta oo hannaanka shaqo qorista ku saleysan qabiilka iyo qurbajoogta soo laabaneysa inta badan shaqadii la heli karay lagu bixiyo, haddana waxa sidoo kale jira shaqooyin aanay Soomaalida qaar ka mid ahi doonayn in ay qabtaan una arkaan shaqooyin hooseeya. Shaqooyinkaasi waxa kamid ah tima jarista, ka shaqeynta maqaayadaha iyo hoteelada iyo nadaafadda.

Balse Soomaali badan ayaa marka ay tahriibaan ku shaqeeya shaqooyinka laga faano marka Soomaaliya la joogo. Mid kamid ah dadka aan wareysannay ayaa yiri, "marka aan tahriibno, waxa aan qabannaa shaqooyinka aan halkan uga faanno." Marka qurbajoog shaqooyin hooseeya kasoo qabtay Yurub iyo dalal kale ay kusoo laabtaan Soomaaliya, waxa ay helaan shaqooyin sarsare mana doonayaan in ay shaqadii ay ka qaban jireen Yurub mid lamid ah ka qabtaan dalka.

Fursadaha shaqo oo yar iyo si khaldan oo loo maamulayo fursadihii koobnaa ayaa loo arkaa in ay sii kordhiyeen tahriibka Soomaaliya. Tayada waxbarashada oo liidata ayaa sidoo kale ah sabab kale oo keenta in shaqo la'aanta iyo tahriibkuba sare u kacaan.

## Tayada Waxbarashada

Markii la weydiiyay sababta ugu weyn ee loo tahriibo, 8 boqolkiiba dadka aan wareysannay ayaa ku jawaabay tayada waxbarashada oo liidata. Natiijada cilmibaaristan waxa ay muujineysaa yegleelidda xarumo waxbarasho gaar loo leeyahay oo aanan qiimeyn iyo kormeer dowladeedkii loo baahnaa lagu sameynin in ay ka dhalatay in dad badan waxbarashada heerarkeeda kala duwan dhameeyaan iyaga oo aanan diyaarsaneyn. Arrintan oo ay wehliso shaqo la'aanta baahsan ee ka jirta dalka waxa ka dhashay tahriib.

Labaatankii sano ee lasoo dhaafay, iskuullo, dallado waxbarasho iyo jaamacado badan ayaa laga furay magaalooyin badan oo dalka ku yaalla. Iskuullada iyo dalladaha waxbarasho waxa la furay xilli aanay jirin dowlad shaqeyneysa, waxa ayna waxbarasho heerarka dugsiyada hoose,

dhexe iyo sare siiyeen dhalinyarada Soomaaliyeed. Balse milkiilayaasha iskuullada ma aanay furin iskuullo farsamo, barashada farsamadii gacantana waa la dayacay.

Jaamacadaha dalka waxa la aasaasay 20-kii sano ee ugu danbeysay si ay tacliinta sare u siiyaan ardayda dhameysata dugsiyada sare. Takhasusyada oo yar ayaa lagu dhaliilay in aanay ka turjumeynin baahida waxbarasho ee dalka. Xog uruurin uu Machadka Heritage ka sameeyay 44 jaamacadood sanadkii 2013 ayuu ku ogaaday in ardayda intooda badan ay bartaan cilmiga kumbiyuutarka iyo maareynta ganacsiga.[13] Xubin sare oo katirsan Jaamacadda Kismaayo ayaa sheegay in aanay dhaqaale iyo macalimiin u heli karin culuumta aadka loogu baahan yahay sida muhandisnimada, beeraha, xanaanada xoolaha, iyo cilmiga badda si ay u buuxiyaan gaabiska tacliinta sare ka jirta.

Balse bare wax ka dhiga jaamacad ku taalla Muqdisho ayaa sababeeyay isku miisaan la'aanta tacliinta sare waxa uuna ku dooday in culuumta bulshada ay ka kharash yar tahay culuumta kale ee seyniska oo ay waalidiinta awoodin in ay lacagaha lagu dhigto bixiyaan. Sababeyntiisa waa mid maangal ah. Dhab ahaantii, tiro badan oo dhalinyaro ah ayaa tahriibtay sababta oo ah waalidiintooda ma awoodin in ay lacagta jaamacadda ka bixiyaan. Hooyo ku sugneyd Baydhabo oo wiilkeeda lagu weysanaa saxaraha Liibiya wakhtiga aan wareysaneynay ayaa sharraxday sababta uu wiilkeeda u tahriibay: “ma awoodin in aan lacagta jaamacadda ka bixiyo. Yaanyo ayaan ku iibiyaa suuqa. Waxa aan helaa celcelis ahaan $3 maalintii, wiilkeygana waxa uu rabay in uu jaamacad dhigto.”

In aanay jirin waxbarasho qiime la awoodo lagu dhigto ayaa qeyb ka ah dhibaatada. Dadaal dowladeed oo lagu bixinayo waxbarasho dowladeed wali ma muuqdo. Sanadkii 2017 miisaaniyadda dowladda federaalka u qoondeysay dhammaan adeegyada bulshada oo ay waxbarashada iyo caafimaadka ku jiraan waxa ay ahayd $8.3 malyan.[14] Maalgelin sidaas u yar waxa adag in waxbarasho dowladeed laga bixiyo. Waxa dhiirrigelin leh in miisaaniyadda 2018 ee dowladda federaalka ah in Wasaaradda Waxbarashada loo qoondeeyay miisaaniyad $7 malyan ah halka ay sanadkii hore ka ahayd $2.2 malyan inkastoo kororkan aanu muujineynin qoondo si gaar ah loogu talo galay iskuullada hoose.[15]

Dhalinyaro badan oo jaamacado dhammeeyay ayaan helin waxbarasho tayo leh. Manhajyada iskuullada si fiican looma diyaariyo, mana mideysna, macalimiintana

[13] Heritage Institute for Policy Studies, “The State of Higher Education in Somalia: Privatization, rapid growth, and the need for regulation”, August (2013): P.2.

[14] For further details read the parliament report, http://www.parliament.gov.so/billtracker/assets/bills/3651513164020.pdf

[15] The detailed 2018 budget is available here, http://www.parliament.gov.so/billtracker/assets/bills/9241511177151.pdf

mushaar ku filan ma helaan.[16] Sidoo kale waxa aan jirin wakaalado ka shaqeeya la socodka iyo kormeerka iskuullada. Dad badan oo aan wareysannay waxa ay sidoo kale ku dhaliileen jaamacadaha in aanay siin ardayda waxbarasho u dhiganta lacagaha ay ka qaadaan. Maaddaama xarumaha waxbarashada dalka intooda badan si gaar ah loo leeyahay lana kormeerin, haweeneey ku sugneyd Beledweyne ayaa sheegtay in arday badan aanay dhigan dugsiyada hoose kana bilaabaan waxbarashada nidaamiga ah heerka dugsiga sare.

Arrimahaas oo isbiirsaday ayaa ka qeyb qaatay in dhallinyaradu ay tahriibaan sababaha soo socda awgood. Kow, qoysas badan ma awoodaan in ay lacagta jaamacadaha ka bixiyaan caruurtooda marka ay dugsiyada sare dhameeyaan. Taasina waxa ka dhasha in dhalinyaradu go'aansadaan in ay tahriibaan inta ay iska joogi lahaayeen guryaha. Qof aan wareysannay ayaa u sheegay cilmibaarayaasha in marka dhallinyarada dhameysay dugsiga sare "aanay awoodin in ay waxbarashadii si wataan, shaqana aanay heli karin, intooda badan waxa ay go'aansadaan in ay tahriibaan si ay u helaan nolol ka fiican tan ay ku nool yihiin."

Labo, maadaama tayada iskuulada hoose, dhexe iyo sare ay liidato, arday badan ayaa iska joojisa waxbarashada, iskuulladana ka taga. Dhalinyaradaas waxa ay rumeysan yihiin in aanay heysanin fursado badan, In badan ayaana tahriiba si ay u bilaabaan nolol cusub.

Saddex, inta badan hay'adaha caalamiga ah, kuwa gudaha, iyo qaar kamid ah xafiisyada dowladda waxa ay daneeyaan in ay shaqo siiyaan dhalinyaro luuqadda Ingiriiska ku fiican. Maadaama iskuullo iyo jaamacado badan aanay u diyaarinin ardayda in ay shaqooyin aqoon iyo tayo u baahan qabtaan, dhalinyaro ka timid dalalka deriska sida Kenya iyo qurbajoogta soo laabaneysa ayaa inta badan hela fursadaha shaqo. Arday jaamacad ka dhigtay Kismaayo ayaa sharraxay: "dhaliyarada wax kasoo bartay Kenya ayaa ka fursad fiican kuwa wax ku bartay magaalada Kismaayo."

In la helo waxbarasho tayo leh oo jaban iyo waxbarashada gaarka loo leeyahay oo dadaalkooda sii kordhiya iyo dowladda oo sharciyadii xoojisa, waxa ay muhiim u yihiin in shaqo abuur la sameeyo. Waxbarashada waxa ay sidoo kale ku caawinaysaa dadka qaar in ay iyagu fursado shaqo abuurtaan. Waxbarasho tayo leh, lana awoodo waxa ay soo saari kartaa shaqaale aqoon iyo karti leh, kaalin wanaagsanna ka qaadan kara koboca dhaqaalaha dalka iyo hoos u dhigidda shaqo la'aanta iyo tahriibka.

## Tiknolojiyadda iyo Saameynta Dhalinyarada

Isticmaalka aaladaha tiknoolojiyadda casriga ah waxa ay sahleen isgaarsiinta. Waxa ayna abuureen xaalad dhaqanka iyo hab-nololeedka ka jira galbeedka uu si toos

[16] Abdullahi Sh. Adam Hussein, "Educational challenges in post-transitional Somalia", *Heritage Institute for Policy Studies*, April (2015).

ah saameyn ugu yeeshay Soomaaliya iyada oo la isticmaalayo aaladda internet-ka. Mid kamid ah ka qeybgalayaasha dood-wadaag ayaa ku dooday in dhalinyarada intooda badan ay ku fikiraan in ku noolaanshaha Galbeedka ay tahay guusha kaliya oo ay naftooda ku hamineyso.

Saameynta dhalinyarada kale ku leeyihiin tahriibka qeyb kama ahayn su'aalaha aan weydiinnay dadka aan xog uruurinta ka sameynay. Balse 2 boqolkiiba dadkii la wareystay ayaa ku jawaabay in saameynta dhalinyarada kale ay keento tahriibka. Markii la weydiyay halka ay ka helaan xogaha la xiriira tahriibka, tiro aad u badan (41 boqolkiiba) ayaa ku jawaabtay aaladda internet-ka.

Iyada oo la isticmaalayo warbaahinta bulshada, dhalinyarada tahriibtay ee ku nool Yurub waxa ay ku dhiirrigeliyaan dhalinyarada dalka ku nool ilaa saddex siyaabood. Kow, waxa ay sawirro qurxoon ugu soo diraan warbaahinta bulshada sida Facebook. Saaxiibbadii hore ee dalka ku sugnaa waxa ay arkaan sawirrada waxaana dhiirrigeliya muuqaallada nolosha ay ku naaloonayaan saaxiibbadood. Wiil dhalinyaro ah ee aan ku wareysannay Muqdisho ayaa sharraxay sida warbaahinta bulshada loogu isticmaalo ku dhiirrigelinta dhalinyaro badan in ay tahriibaan: "saameynta way baaxad weyn tahay. Hal sawir oo uu soo dhigo baraha bulshada ayaa ku filan. Dhammaan dhalinyarada kale way tahriibayaan markii ay arkaan sawirkaas. Waxa ay sawiranayaan nolosha wacan ee uu saaxiibkood ku jiro."

Labo, dhalinyarada tahriibtay waxa ay si toos ah ula soo xiriiraan saaxiibbadood ku nool Soomaaliya iyaga oo istcmaalaya teleefoon ama baraha bulshada waxa ayna u sharraxaan qorshayaalkooda iyo noloshooda cusub. Waalid ku sugnaa Burco ee uu wiilkiisu tahriibay ayaa sharraxay xaaladdan: "dhalinyarada tahriibtay waxa ay soo wacayaan dhalinyarada dalka ku nool waxa ayna usoo dirayaan sawirro."

Shan kamid ah toddobo dhalinyaro ee tahriibkoodu fashilmay ee aan wareysannay ayaa u sheegay cilmibaarayaasha sababta ugu weyn oo ay u tahriibayeen in ay ahayd saameynta saaxiibbadooda kale. Waxa ay doonayeen in ay tahriibaan sababtoo ah inta badan saaxiibbadoodii hore ayaa tahriibay. Mid kamid ah dhalinyaradaas ayaa yiri: "marka ay saaxiibbadaa tahriibaan, waxa aad ku fikireysaa in kaligaa lagaa tagay."

Saddex, dhalinyarada qaar ee tahriibay waxa ay dib ugu soo laabtaan deegaannadooda iyaga oo wata lacago. Marka ay dhalinyaradii kale arkaan, dhiirrigelin kale umaba baahna. Qof u-ol-oleeye arrimaha dhalinyarada ee ku sugnaa Burco ayaa saameyntan sharraxay: "kooxdii ugu horreysay ee ka tahriibay magaalada ayaa dib usoo laabtay. Qoysas cusub ayay unkeen, gawaarida raaxada ayay gateen, guryo waaweynna way dhisteen, taasina waxa ay saameyn ku yeelatay dhalinyarada kale."

## Amniga

Markii la weydiiyay sababaha tahriibka dhaliya, 18 boqolkiiba dadka aan xog uruurinta ka sameynay ayaa ku jawaabay amni xumo. 28 boqolkiiba ee ku noolaa magaalada Beledweyne ayaa amni xumo ku sababeeyey waxa keena tahriibka, waxana ku xigay Muqdisho (25 boqolkiiba), Kismaayo (19 boqolkiiba), Gaalkacyo (14 boqolkiiba), Baydhabo (11 boqolkiiba), iyo Boosaaso (3 boqolkiiba). Burco cid amni xumo ku jawaabtay ma jirin.

Gaalkacyo waa magaalo labo u qeybsan colaado soo noqnoqday ayaana ka dhacay. Beledweyne waxa sidoo kale ka dhaca dagaallo beeledyo. Maadaama ay fadhi u tahay dowladda federaalka, dadka ku nool Muqdisho waxa ay la kulmaan weerarro joogto ah, dhimasho iyo dhaawacyo badan, iyo dilal qorsheysan. Magaalooyinka Baydhabo iyo Kismaayo waxa ku hareereysan al-Shabaab. Sidaas darteed, ma ahan mid la yaab leh in magaalooyinkan xiriir ka dhexeysiiyeen amni xumida iyo tahriibka.

Sida aan uga soo faalloonnay qeybta hore, magaalooyinka Burco iyo Boosaaso waxa ay dhalinyaradu uga tahriibtaa inta badan fursadaha shaqo oo yar iyo saameynta dhalinyarada kale ee tahriibtay. Arrinkanna waxa uu muujinayaa in amni xumida ay sabab muuqata ee loo tahriibo ka tahay gobollada dhaca koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, balse fursad la'aantu ay tahay sabab weyn oo ay u tahriibaan dhalinyarada ku nool gobollada waqooyiga iyo waqooyi bari Soomaaliya.

Khatarta amni ma ahan mid ka timaada kaliya al-Shabaab. Waxa ay sidoo kale ka timaadaa beelaha dagaallama, in aad la shaqeyso dowladda ama gabood-falka ciidamada ammaanka marka ay ku jiraan howlgallada. Macallin ku sugnaa Gaalkacyo ayaa tilmaamay sida dagaallada beelaha iyo u shaqeynta dowladda ugu khasabto dhalinyarada magaalada in ay tahriibaan. Waxa uu yiri: "haddii uu qof katirsan beeshaada uu dilo qof kasoo jeeda beel kale, qaraabada qofkaas la dilay waxa ay ku kici karaan fal aargudasho. Haddii aad u shaqeyso dowladda waa lagu bartilmaameedsanayaa. Labadaas xaaladba, waxa lagugu khasbayaa in aad dalka ka cararto." Qeybsanaanta magaalada waxa ay caqabad ku ahayd dhalinyarada Gaalkacyo. Mid kamid ah dhalinyarada ayaa sheegay in aanay si xor ah ugu gudbi karin dhinaca kale ee magaalada.

Dhalinyarada qaar waxa si khaldan ula dhaqma al-Shabaab iyo ciidamaada dowladda. Wiil dhalinyaro ah ee ku sugnaa Kismaayo ayaa sharraxay xaaladda: "dhalinyaradu waa dhibanayaal. Waa kuwa ugu nasiibka xun bulshada. Dowladda iyo mucaaradka (al-Shabaab iyo kooxaha hubeysan) dhammaan si xun ayay ula dhaqmaan." Dhalinyarada waxa ay u sheegeen cilmibaarayaasha in ay doonayaan in ay tahriibaan si ay uga baxsadaan siyaabaha khaldan ee loola dhaqmo.

Qaar badan oo kamid ah dadka aan wareysannay ama ka qeyb qaatay dood wadaagga waxa ay ka dhawaajiyeen xiriirka ka dhexeeya amni xumida iyo shaqo la'aanta. Safiirka Turkiga ee Soomaaliya, oo faallo ka bixinayay arrimaha maalgashiga ayaa ka dhawaajiyay in xaaladda amni ay tahay arrinta ugu weyn ee dib u dhigeysa maalgashiga Turkiga ee Soomaaliya. Amniga oo hagaaga waxa uu yareyn karaa caqabadaha ku hor gudban maalgashiga, waxaana ka dhalan kara abuurista shaqooyin, kuwaasoo kaalin ka qaadan kara yareynta tahriibka dhalinyarada.

## Shabakado Dadka Tahriibiya

Shabakadaha dadka tahriibiya waxa ay soo ifbaxeen sanadihii lasoo dhaafay. Shabakadahan waxa ay bixiyaan kharashka tahriibka ku baxa ilaa uu tahriibuhu ka gaaro Suudaan ama Liibiya, kadibna waxa ay dib u sheegtaan lacagtii ay ku kharash gareeyeen tahriibaha. Shabakadahan waxa ay qiimeeyaan dadka ay tahriibinayaan iyo hantida ay waalidiintooda ka heli karaan. Inta badan waxa ay u heystaan tahriibayayaasha madaxfurasho ilaa laga siiyo lacagta.

Xuduudaha oo aan la ilaalinin ayaa qeyb ka qaatay kororka shabakadaha dadka tahriibiya. Waxa sidoo kale qeyb ka qaatay tiknoolojiyada casriga ah ee sahashay xiriirka ay la leeyihiin shabakadaha kale ee dalalka dibadda ka dhisan. Hannaanka tahriibinta dhalinyarada waa mid ka fudud sidii hore ee loo tahriibi jiray, waxa uuna soo jiitay dhalinyaro badan ee raba in ay tahriibaan.

## Rajada oo Hooseysa iyo Maamullo Tabaryar

Tahriibka waxa uu yimaadaa marka uu qof ka niyad jabo xaaladda uu ku nool yahay. Dhalinyarada Soomaaliyeed waa ay tahriibayaan sababtoo ah waxa ay ka niyad jabsan yihiin xaaladaha amni, waxbarasho iyo fursado ee dalka ka jirta. Dhalinyaro badan ayaa niyad jab ka muujiyay itaal darrida dowladda, musuqmaasuqa iyo in aan xoogga la saareyn in shacabku helo adeegyada dowladda ee muhiimka ah.

Dhalinyaro badan oo ka qeyb qaatay daraasaddan waxa ay rajo xumo ka qabeen dalka. mana u arkeyn in mustaqbalkoodu ku jiro in ay dalka sii joogaan. Waxa ay sheegeen in tayada waxbarashadu ay liidato, shaqo la'aanta ay sarreyso, shaqada aanan hab cadaalad ah lagu helin, amni xumo ay jirto, tabarta hay'adaha dowladduna ay liidato. Waxa ay sidoo kale ka dhawaajiyeen in ay aad u yar yihiin goobaha madadaallada sida garoomada ciyaaraha, goobaha akhriska, iyo jardiimooyinka nasashada.

Waxaa dhici karta in isbeddelkii siyaasadeed ee dhacay sanadkii 2017 uu saameyn ku yeeshay aragtidii ay qabeen qaar kamid ah dadkii aan wareysannay. 8-dii Febraayo, baarlamaanka federaalka ayaa u doortay Maxamed Cabdullaahi Farmaajo in uu noqdo madaxweynaha dalka. Farxadda ay muujiyeen dad badan waxa ay calaamad u

ahayd in ay dib usoo noolaatay rajadii laga qabay dalka. Balse waxaa muuqata in go'aannadii siyaasadeed oo ay qaadatay dowladda sanadkii 2017 oo ay kamid ahayd in Itoobiya loo dhiibay xubin katirsanaa jabhadda ONLF in ay abuurtay niyad-jab shacab.

### Sababo Kale

Waxa jira sababo kale ee keena in dhalinyaradu tahriibto waxaana kamid ah in aanan war badan laga heyn khatarta tahriibka, takoorid dhallintu la kulmaan iyo goobo madadaallo oo aan jirin.

Wacyigelin la'aan ku aaddan khatarta tahriibka iyo khataraha ka danbeeya markii la gaaro dalal kale, ayaa sabab kale u ah tahriibka. Mid kamid ah dadka aan wareysannay ayaa yiri, "cidna uma sheegeyso dhalinyarada khatarta tahriibka. Haddii loo sheegi lahaa sida uu u halis badan yahay, kuma dhiirradeen in ay tahriibaan."

Sabab kale oo dhalisa tahriib ayaa ah takooridda. Soomaalida waa beelo iyo jufooyin. Waxa jira beelo loo arko in ay ka hooseeyaan beelaha kale. Xubnaha beelahan looma oggolaado in ay beelaha kale ka guursadaan, waxaana loogu yeeraa magacyo lagu liidayo. Kusow iyo Eno (2015) waxa ay u qeybiyeen beelaha la sheego in ay tiro yar yihiin ee Soomaaliya ku nool ilaa saddex: Reer Xamar, Jareer, iyo beelo xirfaddooda lagu faquuqo. Sida ay qabaan labadan qoraa, Jareer waxa lagu takooraa muuqaalkooda oo ka duwan Soomaalida kale. Beelaha kale xirfaddooda ama shaqada ay qabtaan oo ah mid Soomaalida kale ka faanaan ayaa lagu takooraa.[17] Dhalinyarada ka dhalatay beelahan waa ay tahriibaan si ay u helaan goobo kale oo ay ku noolaan karaan iyaga oo aan la takooreynin.


Ugu danbeyn, goobo madadaallo oo aan jirin ayaa lagu tilmaamay in ay dhalinta ku daliso tahriibka. Maktabado akhris, mashariicda iskaa wax u qabso, iyo garoomada ciyaaraha aad ayay u kooban yihiin. Arrintan oo ay wehliso shaqo la'aan waxa ay siineysaa dhalinyarada wakhti badan oo ay ku fikiraan. Dhalinyaro badan ayaa markaasi tahriib go'aansata, qaar kalena, gaar ahaan dhalinyarada ku nool koonfurta Soomaaliya, waxa ay ku biiraan al-Shabaab iyo kooxaha kale ee hubeysan.

## Dalalka Loo Tahriibo iyo Sida Lagu Gaaro

Sida natiijada cilmibaaristan ay muujineyso, inta badan tahriibayaasha Soomaalida waxa ay u tahriibaan Yurub. 55 boqolkiiba dadka ku jawaabay in xubno ka tirsan qoyskooda tahriibeen, waxa 54 boqolkiiba xubnaha ka tahriibay u safreen dalalka Yurub. Maadaama ay ka fogtahay Soomaaliya, toddobo boqolkiba kaliya ayaa u tahriibay

[17] Abdi M. Kusow and Mohamed A. Eno, "Formula Narratives and the Making of Social Stratification and Inequality", Sociology of Race and Ethnicity © American Sociological Association, Copenhagen, Denmark, International Migration Vol. 1(3) (2015): 413.

Mareykanka. 19 boqolkiiba ayaa aadday Sacuudi Carabiya, halka 15 boqolkiiba ay u tahriibeen Koonfur Afrika. Shan boqolkiiba ayaa u tahribay dalal kale.




Dadka aan ku wareysannay magaalooyinka Burco (23 boqolkiiba), Boosaaso (20 boqolkiiba), Beledweyne (18 boqolkiiba), Muqdisho (17 boqolkiiba), Gaalkacyo (9 boqolkiiba), iyo Kismaayo (8 boqolkiiba) ayaa noo sheegay in xubno ka mid ah qoyskooda ay u tahriibeen Yurub. Shan boqolkiiba kaliya dadka aan xog uruurinta ka sameynay magaalada Baydhabo ayaa sheegay in xubno katirsan qoyskooda u tahriibeen Yurub.

Tahriibayaasha Soomaalida waxa ay jecel yihiin Yurub sababta oo ah, waxa ay aaminsan yihiin xaaladaha shaqo iyo ku noolaasho ee Yurub in ay ka fiican tahay midda ka jirta dalalka Khaliijka. Qof ka qeyb galay dood-wadaag lagu qabtay Gaalkacyo ayaa tilmaamay: “haddii aad ka shaqeyso Sacuudi Carabiya, xuquuq shaqo iyo mid biniaadam ma heleysid, laakiin Yurub xuquuqda biniaadamka waa laga qiimeeyaa. Yurub layskama soo tarxiilo. Haddii aadan shaqeyninna, waxa aad heleysaa ceyr. Taasina suuragal kama ahan Sacuudi Carabiya. In aad sharci ka hesho Yurub ayaa sidoo kale ka sahlan in aad baasaboor ka hesho Sacuudi Carabiya.”

Magaalada Baydhabo ee ku taalla koonfurta Soomaaliya waxa kasoo baxday natiijo middaas ka duwan. Dadka aan xog uruurinta ka sameynay, saddex qeybood qeyb (32 boqolkiiba) waxa ay sheegeen in xubno qoyskooda ah ay u tahriibeen Sacuudi Carabiya. Magaalooyinka Muqdisho (22 boqolkiiba) iyo Beledweyne (19 boqolkiiba) ayaa sidoo kale Sacuudi Carabiya looga tahriibay. Balse sagaal boqolkiiba dadka aan ka wareysannay Gaalkacyo iyo lix boqolkiiba dadka Kismaayo, Boosaaso, iyo Burco ayaa xubnaha qoyskoodu u tahriibeen qaaradda Aasiya inkastoo ay u dhaw yihiin Badda Cas.

Markii la weydiiyay sababta ay Sacuudi Carabiya ugu tahriibaan, mid kamid ah koox dood-wadaag loogu qabtay Baydhabo ayaa soo koobay: “waa rakhiis, khatarteedu yar tahay, wakhti koobanna lagu gaari karo.” Qof kale ayaa ku qiyaasay qiimaha safarka Sacuudi Carabiya ilaa $500, taasoo ah lacag yar marka loo barbar dhigo qiimaha ku baxaya tahriibka Yurub.

Dadka aan ka wareysannay gobollada dhaca bartamaha iyo waqooyiga Soomaaliya ma jecleyn shaqooyinka muhaajirinta ka qabtaan Sacuudi Carabiya iyo dalalka kale ee ku yaalla Aasiya. Qof aan ku wareysannay Gaalkacyo ayaa yiri: “dumarka ka tahriiba gobolka Mudug ma jecla in ay adeegto guri noqdaan. Qaar yar oo kamid

ah dumarka Mudug ayaa u tahriiba Sacuudi Carabiya, waxa ayna u badan yihiin dumar la furay.” Qof kale ee aan Boosaaso ku wareysannay ayaa yiri: “Itoobiyaanka iyo dadka ka yimaada koonfurta Soomaaliya ayaa ah dadka ugu badan ee u tahriiba Yemen.”

Qaar badan oo kamid ah dadka deggan Beledweyne, Muqdisho iyo Kismaayo waxa ay u tahriibeen Koonfurta Afrika iyo dalalka kale ee Afrika ku yaalla, inkastoo aanay qaarkood ku nagaanin dalalkaas. Qof ka qeyb galay dood-wadaag ayaa yiri: “dhalinyarada Kismaayo intooda badan waxa ay u tahriibaan dalalka Angoola, Koonfur Afrika, iyo Musambiik. Marka ay ka shaqeystaan dalalka Afrika, waxa ay u safraan Mareykanka ama Yurub.” Aragti uruurinta aan ka sameynay Kismaayo waxa ay muujineysaa in meesha ugu dambeysa oo ay hiigsadaan dadka ka tahriiba Kismaayo in ay tahay Mareykanka (30 boqolkiiba) marka la barbar dhigo Beledweyne (19 boqolkiiba), Muqdisho iyo Gaalkacyo (13 boqolkiiba), Burco iyo Baydhabo (10 boqolkiiba) iyo Boosaaso (5 boqolkiiba).

Cilmibaaristan waxa ay ogaatay in meelaha ay ku yaallaan magaalooyinka ay saameyn weyn ku leedahay goobaha laga tahriibo iyo dalalka lasii maro. Tahriibayaasha Kismaayo, oo ah magaalo u dhaw Kenya, waxa ay badankooda u tahriibaan Koonfurta Afrika. Sabab kale oo ay u door bidaan dalalka Afrika ayaa ah khatarta tahriibka iyo lacagta ku baxeysa. Tahriibka Koonfur Afrika waxa ku kaceysa lacag gaareysa $2,000 ilaa $3,000, waana ka khatar yar tahay tahriibka Yurub.

Meesha ugu badan ee loo maro Sacuudi Carabiya ayaa ah gobollada Bari iyo Sanaag iyo dalka Yemen. Laba xarun oo laga tahriibo ayaa ku taalla Puntland: Mareero oo ku taalla Boosaaso iyo Ceelaayo oo ku taalla Sanaag. Xarumahan waxa looga gudbaa dalka Yemen. In Yemen loo tahriibo iyada oo lasii marayo Boosaaso ayaa aad u badneyd wakhtiga xog uruurinta aan ka sameynay waqooyiga Soomaaliya, sababtoo ah Itoobiya ayaa adkeysay xuduudaheeda.


Dadka u tahriiba Yurub ayaa sidoo kale mara khadkan waxa ayna Yemen ka aadaan Suudaan. Marka ay tahriibayaasha gaaraan Suudaan, waxa jira labo waddo oo ay qaadaan: mid waxa ay geyneysaa Liibiya halka midda kale ay geyneyso Masar. Khad kale oo la isticmaalo ayaa ah Itoobiya, Suudaan, Liibiya kadibna Talyaaniga. Khadkan waxa uu u fudud yahay dadka ka tahriiba Soomaaliland, Puntland iyo gobollada dhexe. Waxa uu ahaa mid kamid ah dariiqyadii ugu horreeyay oo ay tahriibayaasha Soomaalida isticmaali jireen inta aanay xuduudaha adkeynin Itoobiya. Dariiqa Kenya oo lagasii aado Suudaan waxa uu u fudud yahay aadna u isticmaala tahriibayaasha ka yimaada Kismaayo iyo Muqdisho ee u socda Yurub.

Tan iyo sanadkii 2014, qaab kale oo ka khatar yar balse qaali ah oo Yurub lagu aado ayaa soo baxay, kaasoo ah in loo safro Turkiga kadibna lagasii aado Giriigga. Inkastoo la isticmaalo dukumintiyo safar,

qaar badan oo kamid ah dadka aan wareysannay ayaa ku fasiray in uu yahay tahriib sharci darro ah. Ka qeybgale dood-wadaag lagu qabtay Gaalkacyo ayaa sharraxay sida Turkiga uu dhabbe loo maro Yurub u noqday: "Turkiga waxa uu deeqo waxbarasho siiyay dowladda federaalka Soomaaliya. Run ahaantii, dad badan ee lagu qaaday in ay arday yihiin ma ahayn arday dhab ah. Waxa ay laaluusheen masuuliyiinta si loogu maleeyo arday." Qof kale ee aan wareysannay ayaa yiri: "tahriibka loo maro Turkiga waa qaali, balse wuu khatar yar yahay." Dalka Turkiga waxa uu beddelay qaabkii loo codsan jiray deeqaha waxbarasho waxa uuna ku khasbay ardayda in ay si toos ah internet-ka uga codsadaan. Sikastaba ha noqotee, tahriibka loo maro Turkiga waxa wali loo arkaa in uu u furan yahay dadka heli kara lacag badan si ay u gaaraan Yurub.

## Fududeynta iyo Kharashka

Markii la weydiiyay cidda fududeysa tahriibka, tiro aad u badan (72 boqolkiiba) ayaa ku jawaabtay shabakado jooga dalka (43 boqolkiiba) ama shabakado jooga dibadda (29 boqolkiiba). In ku dhaw afar meelood meel (22 boqolkiiba) ayaa ku jawaabay in ay fududeeyaan xubnaha qoyska, qaraabada ama saaxiibbada. Lix boqolkiiba ayaa sheegay fududeeyayaal kale.




Tahriibiyayaal ku sugan Soomaaliya ayaa la rumeysan yahay in ay ku badan yihiin shan kamid ah toddobada magaalo ee aan cilmibaaristan ka sameynay: Muqdisho (23 boqolkiiba), Boosaaso (21 boqolkiiba), Burco (17 boqolkiiba), Beledweyne (15 boqolkiiba), iyo Gaalkacyo (12 boqolkiiba). Inta badan dhalinyarada ku nool shantan magaalo waxa ay u tahriibaan Yurub. Kaliya 7 boqolkiiba ee ku sugneyd Kismaayo iyo shan boqolkiiba ee ku sugneyd Baydhabo ayaa sheegay in ay tahriibiyayaal joogaan. Arrinkan waxa ay daliil u tahay shabakadaha wax tahriibiya ee ku sugan dalka in ay ku badan yihiin magaalooyinka looga tahriibo Yurub.

In ka badan afar meelood meel (27 boqolkiiba) dadka aan ka wareysannay Kismaayo ayaa ku jawaabay in shabakadaha wax tahriibiya ee ku sugan dibadda ay fududeeyaan tahriibka. Tahriibayaasha ugu badan ee kasoo jeeda Kismaayo waxa ay intooda badan ka tahriibaan Kenya si ay u gaaraan dalalka Afrika oo ay ugu horreyso Koonfur Afrika ama waxa ay ka tahriibaan Suudaan si ay u gaaraan Yurub.

Tiro badan (34 boqolkiiba) oo kamid ah dadka aan xog uruurinta ka sameynay magaalada Baydhabo waxa ay ku jawabeen in xubnaha qoyskooda, qaraabada iyo saaxiibbadood fududeeyaan tahriibka Sacuudi Carabiya ee loosii maro Boosaaso iyo Yemen. Maadaama Sacuudi Carabiya aanay aad uga fogeyn Soomaaliya marka la barbar dhigo Yurub, tahriibayaal badan uma baahdaan shabakado safarka usii diyaariya. Kharashka lagu tago Sacuudi Carabiya waa uu yaryahay, sidaas darteed shabakadaha wax tahriibiya uma arkaan fursad weyn oo ay lacag ka sameyn karaan. Magaca guud ee loogu yeero dadka tahriibka Sacuudi Carabiya fududeeyo waa mukhallasiin.

Waxa jira shabakado fududeeya tahriibka. Masuuliyiin katirsan dowladda ayaana xubno ka ah shabakadahan. Tahriibayaasha qaarkood waxa ay helaan fiisa ay ku tagaan Suudaan si ay toos Liibiya uga sii aadaan. Dad ku lug leh dowladda federaalka ayaa la sheegay in ay fududeeyaan safarrada noocaasi ah. Laakiin waxa jirtay dadaallo lagu joojinayo arrintan. Tusaale ahaan, waaxda socdaalka ee gegida diyaaradaha Muqdisho waxaa lagu amray, sida uu wasiir noo sheegay, in aanay oggolaansho safar siinin dhalinyarada ka yar 30-ka sano ee u safraya dalal gaar ah ilaa ay keenaan qof damiin ka ah oo caddeeya ujeedada safarkooda.

Saraakiil dowladeed oo ay ku jiraan diblomaasiyiin ayaa la rumeysan yahay in ay fududeeyaan tahriibka. Qof ama hay’ad kaligeed tahriibaha uma fududeyn karto waxyaabaha looga baahan yahay waaxda socdaalka iyo gegida diyaaradda iyada oo aan gacan laga helin saraakiil dowladeed. Fiiso iyo dukumintiyo safar ayaa loo baahan yahay, waxaana la aaminsan yahay in dad masuuliyiin ah ay fududeeyaan.

Tahriibku ma lahan qiime go’an waxa uuna ku xiran yahay dariiqa loo maro iyo cidda fududeyneysa. Qiimaha tahriibka Sacuudi Carabiya wuu yaryahay. Koonfurta Afrika ayaa ka qaalisan. Balse tahriibka Yurub iyo Mareykanka ayaa ah kuwa ugu qaalisan, waxaana ku baxa lacag celcelis ahaan gaareysa 10,000 ilaa 20,000 doolarka Mareykanka. Qiimaha safarka aan sharciga ahayn ee diyaarad lagu safrana wuu kasii badan yahay.

Shabakadaha fududeeya tahriibka Liibiya iyo Badda Mediterranean-ka waxa loo yaqaannaa ‘magafayaal’.[18] Magafayaashu waxa ay bixinayaan kharashka ku baxaya safarka ilaa laga gaarayo Liibiya kadibna waxa ay soo wacayaan waalidiinta si ay lacag madax furasho ah uga qaataan caruurtoodana usii daayaan.

Waalidiin badan ayaa hantidooda iibiya, qaar kalana waxa ay lacago kasoo uruuriyaan xubnaha qoyska, qaraabada iyo saaxiibbada. Madaxfurashada magafe waa khasab, lagamana gorgortamo. Waxaana caadi ah in la arko aabbe ka istaagaya

[18] Magafe shabakad lacag ka sameyso tahriibinta dadka. Shabakadda waxa ay ka shaqeysaa Soomaaliya iyo dalalka deriska waxa ayna lacag madax furasho ah ka dalbadaan waalidiinta muhaajiriinta waxa ayna ugu caga jugleeyaan in ay dilayaan caruurtooda haddii aanay lacagta bixinin.

masaajid ee ka codsanaya dadka salaadda soo tukaday in ay la bixiyaan lacagta uu siin lahaa magafe oo ilmo uu dhalay ka heysta.

Inta badan waxa jira dhowr magafe, taasoo micnaheedu yahay waalidiinta dhowr jeer ayay lacag bixinayaan. Aabbe ayaa sharraxay xaaladda uu ku sugna wiilkiisa markii uu soo wacay: "waxa uu ii sheegay in uu gacanta ugu jiro magafihii koowaad oo doonayay lacag dhan $3,000. Taasi waa albaabkii koowaad. Doontii iyo magafihii weynaa ayaa dhinnaa. Mar labaad ayaa la qabtay waxaana lagu waajibiyay in uu bixiyo $5,000. Waa uu qeylinayay markii uu isoo wacayay waxa uuna ii sheegay in si xun loo jirdilay kiliyihiisana la iibin doono haddii aan lacagta bixin waayo." Waaliddiin kale ayaa noo sheegay isla qaabkaa magafayaashu u jirdilaan tahriibayaasha si ay lacagta madax furashada u helaan.

Qof kale ee aan wareysannay ayaa sharraxay sida ay shabakadda u shaqeyso: "hal shardi ayaa ah in qofka la tahriibinayo ay hooyadiis nooshahay maadaama hooyooyinku ka qalbi jilcan yihiin aabayaasha. Marka tusaale ahaan, dhalinyarada la xiro, hooyooyinka waxa ay diyaar u yihiin in ay wax waliba u huraan." Waxa uu sidoo kale sheegay in qoyska tahriibaha uu leeyahay dhul ama hanti in ay tahay sifo kale oo lagu xusho dhalinyarada la tahriibiyo.

Xawaaladaha ayaa kaalin fududeyn ka qaata is dhaafsiga lacagaha laga qaado waalidiinta loona geeyo magafayaasha. Waalid ku sugnaa Boosaaso ayaa waxaa la siiyay nambarka qof joogay Baydhabo si uu lacagta ugu diro xawaalad ahaan. Arrinkan waxaa looga dan leeyahay in waalidiintu aanay garanin dadka wax tahriibiya.


Hal arrin oo ay fududeeyeen shabakadahan wax tahriibiya ayaa ah in Soomaalida markii hore saxaraha Liibiya ugu dhiman jirtay gaajo iyo harraad. Hadda shabakadda ayaa quudineysa muhaajiriinta waxaana ay dib ugu dallacayaan waalidiintooda.

Waxa jira dhiirrigelin loo sameeyo dhalinyadada soo qalqaalisa tahriibayaasha sida wiil aan ku wareysannay Boosaaso. Waxa uu yiri: "haddii aad iskusoo uruuriso 21 qofood oo tahriib diyaar u ah, lacagta doonta lagaama rabo."

Maadaama tahriibka lacag badan laga sameeyo, tirada dadka wax tahriibiya waa ay sii kordhayeen. Puntland oo kale, hal beel ayaa maamusha ka ganacsiga tahriibka. Qof aan wareysannay ayaa yiri: "inta badan dadka wax tahriibiya, 60 boqolkiiba, waxa ay kasoo jeedaan beesha degta xeebta." Shabakadahan waxa ay xiriir xooggan la leeyihiin magafayaasha dibadda ku nool. Marka tahriibayaasha laga qaado Boosaaso, waxa jira koox kale oo kusii sugeysa Yemen si ay usii wadaan.

## Caqabadaha Lala Kulmo Xilliga Tahriibka

Waxa la weydiiyay dadka aan xog uruurinta ka sameynay khataraha ugu badan oo ay wajahaan tahriibayaasha, 36 boqolkiiba ayaa ku wajaabtay dhimasho. Ku dhawaad afar meelood meel (24 boqolkiiba) ayaa ku jawaabay jirdil. Xabsiyeyn aan sharci ahayn (15 boqolkiiba), caqabado dhaqaale (12 boqolkiiba), iyo kufsi (8 boqolkiiba) ayaa sidoo kale ahaa caqabadaha la sheegay in lala kulmo xilliga lagu guda jiro tahriibka.




Marka magaalo ahaan loo fiiriyo, 20 boqolkiiba dadka aan ka wareysannay Burco, 18 boqolkiiba dadka joogay Kismaayo, 17 boqolkiiba ka qayb-galayasha reer Muqdisho, 14 boqolkiiba ee dadka aan ka wareysannay Gaalkacyo iyo 12 boqolkiiba dadka aan ka wareysannay Boosaaso waxa ay ka dhawaajiyeen in dhimashada tahay khatarta ugu badan oo ay la kulmaan tahriibayaasha. 10 boqolkiiba ee ku sugnaa Baydhabo, iyo sagaal boqolkiiba dadka aan ka wareysannay Beledweyne ayaa sidoo kale dhimashada u arkay caqabadda ugu weyn. Tahriibayaasha magaalooyinkan waxa ay inta badan aadaan Yurub oo ay khatarteedu badan tahay maadaama lasii marayo magafe, saxaraha, iyo badda.

Sida ay qortay UNHCR, tiro lagu qiyaasay 3,116 tahriibe ayaa ku geeriyootay badda Mediterranean sanadkii 2017 oo kaliya.[19] Tiro badan oo dadkaasi kammid ah waxa ay ahaayeen Soomaali. Sababta ugu weyn oo la rumeysan yahay in ay u geeriyoodeen ayaa ah iyada oo ay muhaajriinta isticmaalaan doomo liita. Bishii Abriil ee sanadkii 2016, in ka badan 200 qofood oo Soomaali ah ayaa naftooda ku waayay badda kadib markii ay quustay doon ay saarnaayeen oo wadday in ka badan 400 tahriibe.[20]

Maadaama khatarteedu badan tahay, qaar badan oo isku dayay in ay tahriibaan ayaa dib isagasoo laabtay. Wiil dhalinyaro ah ayaa sharraxay sababta uu usoo laabtay: "waan cabsaday. Saddex qofood ayaan ahayn. Hal badda ayuu ku dhintay. Midkii kalana waxa uu hadda joogaa Sweden. Aniga waan cabsaday, mana heysanin lacag igu filan ee aan kusii safro."

[19] IOM, " *Mediterranean Migrant Arrivals Reached 171,635 in 2017; Deaths Reach 3,116*", 05 January 2018, https://www.iom.int/news/mediterranean-migrant-arrivals-reached-171635-2017-deaths-reach-3116


[20] Hiiraan Online, *"Boqolaal dhalinyaro Soomaaliyeed ah oo ku naf-waayay Doon ay ku Tahriibayeen oo la Quustay"*, April 2016, http://www.hiiraan.com/news/2016/apr/wararka_maanta18-95609.htm

Jirdilka ayaa la sheegay in uu yahay caqabad weyn oo ay la kulmaan tahriibayaasha u safra Liibiya iyo Sacuudi Carabiya. Dadka aan xog uruurinta ka sameynay magaalooyinka Muqdisho (28 boqolkiiba), Boosaaso (17 boqolkiiba), Baydhabo (15 boqolkiiba) iyo Beledweyne (14 boqolkiiba) dhammaan waxa ay sheegeen jirdilka in uu yahay caqabadda ugu weyn. Kow iyo toban boqolkiiba dadka Kismaayo, sagaal boqolkiiba dadka Gaalkacyo, iyo lix boqolkiiba dadka Burco ayaa sidoo kale caqabad u arkay jirdilka. Shan boqolkiiba waxa ay sidoo kale qabeen walaac la xiriira xabsiyeyn aan sharci ahayn.

Magafayaasha ayaa loo fahamsan yahay in jirdilka ugu badan iyo xabsiyeyta aan sharciyeysneyn u geystaan dhalinyarada u tahriibaya Yurub ee sii mara saxaraha. Shabakadda magafe waxa ay xiraan jir dilna u geystaan tahriibayaasha si ay qoysaskooda u bixiyaan madax furasho si degdeg ah. Sidaas oo kale, xabsiyeynta, jirdilka iyo kufsiga ayaa ah khatar ay wajahaan tahriibayaasha Sacuudi Carabiya. Meesha ugu badan ee lagu jirdilo tahriibayaasha laguna xero ayaa ah xuduudda u dhexeysa Yemen iyo Sacuudi Carabiya. Wiil aan ku wareysannay Baydhabo ee lagasoo tarxiilay Sacuudi Carabiya ayaa yiri: “meesha ugu daran tahriibayaasha waa xuduudda u dhexeysa Yemen iyo Sacuudi Carabiya.”

## Tahriibka Kadib

Tiro aan badneyn oo kamid ahaa dadkii ka qeyb qaatay daraasaddan ayaa soo arkay nolosha ka danbeysa tahriibka. Caqabado luqadeed iyo dhaqan (37 boqolkiiba) iyo hannaanka magangalyada (33 boqolkiiba) ayaa loo arkay labada caqabad ee ugu weyn oo ay muhaajiriinta kala kulmaan dalalka ay u tahriibaan. 15 boqolkiiba ayaa ka dhawaajiyay caqabad shaqo halka in la helo deegaan (3 boqolkiiba) iyo waxbarasho (2 boqolkiiba) ay ahaayeen caqabado aan sidaas u buurneyn.




Caqabadaha luqadda iyo dhaqanka waa caqabado wakhti kooban wajaha muhaajiriinta halka ay hannaanka magangalyadu tahay tan ugu wakhtiga fog. Kaddib safar dheer oo dhib badan, in Yurub laga helo deegaan iyo sharci deganaansho way adag tahay. Marka ay muhaajiriinta Soomaalida gaaraan Talyaaniga, intooda badan waxa ay kasii aadaan dalalka kale ee Yurub ee soo dhaweeya qaxootiga, hannaanka magangalyadana uu fudud

yahay. Shabakado dadka kasii safriya Talyaaniga ayaa ka sameysmay Talyaaniga.

Nolosha ay tahriibayaashu kala kulmaan Yurub waxa ay ka duwan tahay midda ay filayeen. Hannaanka sharci helidda waxa ay qaadataa sanado badan, Soomaalida waxa ay wajahaan caqabado deganaansho. Qaar ayaa guryo la'aan noqda. Cilmibaaraha daraasaddan ayaa wareystay qof Soomaali ah oo kusoo arkay wadooyinka Faransiiska tahriibayaal Soomali ah oo aan guryo heysan. Aabbe aan ku wareysannay Burco oo kumannaan doollar ku bixiyay tahriibka wiilkiisa ayaa yiri: "waxa aan la murugeysanahay ayaa ah in wiilkeyga raashiin laga keenay kaniisadaha uu cuno derbiyadana uu jiifto."

Inta badan fursadaha shaqo oo ay helaan tahriibayaasha ayaa ah shaqooyinka aan aqoonta u baahneyn oo ay intooda badan ka faani jireen markii ay dalka joogeen. Waa wax la wada ogyahay in qurbajoog badan ee dalka kusoo laabatay oo ganacsi ku jirta ama siyaasadda gashay in aanay ka helin dalalka Yurub shaqooyinka ay ka helaan kana raadiyaan Soomaaliya.

Hannaanka magangalyada Sacuudi Carabiya aad ayuu u dhib badan yahay. Soomaalida ku nool kana shaqeysa Sacuudiga waxa ay wajahaan cabsi iyo xeritaan joogto ah iyo tarxiil. Fursadaha laga helo Sacuudiga ayaa u badan farsamada gacanta iyo dhismaha guryaha. Dumarka inta badan waxa ay adeegayaal ka noqdaan guryaha.

Koonfurta Afrika waxa dilal loogu geystaa Soomaalida. Sidaas darteed, qaar ayaa dib ugasoo laabta khatarta ay la kulmaan awgeed. Wiil kasoo laabtay Koonfur Afrika ee aan ku wareysannay Kismaayo ayaa yiri: "waxa aan u tahriibay Koonfur Afrika. Ma doonayo in aan mar kale tahriibo. Dal aan dalkaaga ahayn waa dareen ku joog. Waxa ay dadka kuu sheegayaan waa been. Marka aad tagto halkii aad u tahriibtay, waxa aad ka shallayneysaa in aad dalkaagii kasoo tagtay." Ka sheekeynta khibradahan oo kale waxa ay wacyigelin fiican u noqon kartaa dhalinyarada raba in ay tahriibaan.


## Waxtarka Qoysaska Laga Tahriibay

Qoysaska inta badan waxa ay iibiyaan hantidooda si ay u bixiyaan kharashka ku baxa tahriibka, qaar badanna waxa ay fishaan in marka ay caruurtooda tagaan halkii ay rabeen in ay lacago usoo diri doonaan. Balse 35 boqolkiiba dadka aan xog uruurinta ka sameynay ayaa sheegay in tahriibayaasha aanay lacago usoo dirin qoysaskii ay ka tageen. Hannaanka magangalyada waxa uu qaataa sanado badan, inta uu socdana tahriibayaasha wax badan uma qaban karo qoysaskii ay kasoo tageen.

Dhinaca kale, tiro badan (34 boqolkiiba) ayaa lacago joogto ah usoo dira qoysaskooda. Hagaajinta xaaladda nololeed ee qoysaska ayaa ah sabab ku dhalisa dhalinyarada in ay tahriibaan. Dalka Soomaaliya, qoyska uu qof dibadda u jiro

waxa loo arkaa qof ladan maadaama lacago loogusoo diro xawaaladaha. Sida uu qoray Bangiga Adduunka, lacag lagu qiyaasay $1.4 bilyan ayay soo diraan Soomaalida qurbajoogta ah ee ka badan 2-da malyan sanad kasta. [21] Qoysaska waxa ay u isticmaalaan lacagahan cunto, hooy, waxbarasho, caafimaad, iyo ganacsiyo yaryar.

Balse 17 boqolkiiba dadka aan xog uruurinta ka sameynay waxa ay sheegeen in tahriibayaasha ay sii fududeeyaan tahriibka dad kale. Sagaal boqolkiiba ayaa sheegtay xubnaha qoyskaaga oo dibadda jiraan in ay sare u qaadeyso kaalinta iyo miisaanka qoyska ku dhex leeyahay bulshada. Waalidiinta caruurtooda tahriibeen lacagana usoo diraan waa la qaddariyaa, in ay lacag deyn ah ka qaataan ganacsatada xitaa waa ay u fududdahay.




[21] World Bank, "*World Bank Makes Progress to Support Remittance Flows to Somalia*", June 10, 2016, http://www.worldbank.org/en/news/press-release/2016/06/10/world-bank-makes-progress-to-support-remittance-flows-to-somalia

## Fursadaha Yar ee Dalka Ka Jira

Daraasaddan waxa ay ogaatay in xiriir toos ah uu ka dhexeeyo fursadaha shaqo iyo tahriibka. Magaalooyinka ay ka jireen mashaariic lagu baranayo xirfado oo ay maalgeliyeen deeq bixiyayaal caalami ah, tahriibku waa ku yaraa.

Fursadaha ugu muuqday toddobada magaalo waxa ay ahaayeen mashaariic horumarineed ee lagu baranayo xirfado oo ay maalgeliyeen deeq bixiyayaal caalami ah si looga hortago xagjirnimada iyo tahriibka. Dadka ka faa'ideysta mashaariicdan waa ardada kasoo dhacday iskuullada iyo dhalinyarada aanan waxbarasho nidaami ah soo marin. Waxa la baraa farsamooyinka kala ah korontada, tubooyinka, harqaanka, fuundinimada, akhriska iyo qoraalka, iyo mallaay dabashada. Dadka dhameysta barashada xirfadahan waxa la siiyaa shahaadooyin iyo lacago ay ku furtaan xarumo ay ku shaqeystaan ama shirkadaha u baahan shaqadooda ayaa lagu xiraa. Balse tirada dhalinyarada ka qalin jebisa xarumahan waa yar yihiin marka la barbar dhigo tirada dhalinyarda ku nool magaalooyinka aan cilmibaarista ka sameynay.

Mashaariicda lagu barto xirfadaha inta badan ma ahan mashaariic Soomaalida ka timaadda, waxa ayna ku tiirsan yihiin maalgelinta deeq bixiyayaal caalami ah. Mashaariicdan labo caqabadood ayaa heysta. Kow, dadka loogu talo galay waa dadka aan wax baran ama iskuullada ku fashilmay, sidaas darteed ardada iskuullada

sare iyo jaamacadaha dhameeyay kama faa'ideystaan. Labo, dadka ka faa'ideysta mashaariicdan qaab beeleed ayaa loosoo xulaa. Dadka aan waxbaranin iyo kuwa iskuullada ku dhacay xitaa fursado isku mid ah uma heystaan. Madaxda ururka fulinayo mashruuca ayaa usoo xusha qaraabada iyo saaxiibbada si ay uga faa'ideystaan fursadaha tababar ee kooban ee maalgelinta loo helay.

Dhalinyarada qaar waxa ay abuurteen fursado sida wadista mootada bajaajka, gaar ahaan dhalinyarada Muqdisho iyo Baydhabo. Magaalada Kismaayo bajaaj waa laga mamnuucay xilliga aan cilmibaarista ka sameyneynay sababo amni awgood. Taksiyada ayaa caan ka ahaa magaalooyinka Boosaaso iyo Burco. Taksiga waxa loogu yeeraa 'hooyo ha iga tahriibin' taasoo muujineysa in waalidiinta qaar ku khasbanaadeen in ay taksi u gadaan caruurtooda si aanay u tahriibin.

Koonfurta Soomaaliya in lagu biiro ciidamada dowladda ama kooxo kale oo hubeysan ayaa dhalinyarada qaar siiso fursad ay ku helaan lacago shaqana u noqoto sikasta oo ay u khatar badan tahay.

Hay'adaha qaar, oo iyagana ku tiirsan maalgelin dibadda ah, ayaa ku dhiirrigeliya dhalinyarada in ay qorshe ganacsi diyaarsadaan maalgelinna u raadsadaan. Waxa ay sidoo kale ku tababaraan dhalinyarada jaamacadaha dhameeyay sida loo qorto arjiga shaqa-doonka (CV) iyo xirfadda lagu wajaho imtixaanka wareysiyada shaqada. Ururradan waa ay yar yihiin tiro ahaan, waxa ayna ka howlgalaan magaalooyinka waaweyn sida Muqdisho, Boosaaso iyo Hargeysa. Xubin ka mid ah ururradan oo aan ku wareysannay Boosaaso ayaa sharraxay sida ay u shaqeeyaan: "waajibka ugu muhiimsan ee na saaran waa in aan fursado shaqo u abuurno dhalinyarada innaga oo ku tababareyna sida ay u sameysan lahaayeen ganacsiyo yaryar. Waxa aan siinnaa tababar ay kamid yihiin sida loo diyaariyo qorshayaal ganacsi. Waxa aan barnaa xirfadaha suuq-geynta. Waxa aan barnaa sida ay kusoo deynsan karaan lacago. Dhalinyarada raadineysa shaqadana waxa aan ku tababarnaa sida loo qorto CV-ga, waxa aan talo ka siinnaa imtixaan shaqada."

Waxa jira barnaamijyo wacyigelin oo aan joogto ahayn inta badanna la qabto marka ay dhalinyaro Soomaaliyeed ku dhintaan badaha. Culumada diinta waxa ay wacyigelin ka sameeyaan masaajidda, ururro kalana waxa ay wacyigelin ka sameeyaan iskuullada iyo idaacadaha. Qaar kale waxa ay qabtaan kulammo. Cilmibaarayaasha Machadka Heritage ayaa ka qeyb galay kulan wacyigelinta tahriibka ee habeen lagu qabtay magaalada Burco bishii Sebteembar sanadkii 2016. Urur dhalinyaro ayaa kulanka abaabulay, culumada diinta, masuuliyiin dowladeed, iyo dhalinyaro ayaa kamid ahaa dadka khudbadaha jeedinayay iyo kaqeyb galayaasha. Kulamadan iyo wacyigelinta noocan oo kale ah waa muhiim balse aad ayay ugu yar yihiin Soomaaliya.

Fursadaha ay abuureen dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada iyo Somaliland waa ay kooban yihiin. Heer federaal marka la eego, golaha wasiirrada ayaa ansixiyay siyaasadda qaran ee dhalinyaradad,[22] balse maamul goboleedyada wali ma lahan siyaasado dhalinyaro oo shaqeynaya. Siyaasad kaliyana kumaba filna. Masuuliyiinta Soomaalida waxa ay ku guuldarreysteen in ay fursado badan u abuuraan dhalinyarada. Waxa ay sidoo kale ka gaabiyeen in ay si wanaagsan u maamulaan hannaanka shaqo qoris ee fursadaha ka jira xafiisyada dowladda. Ganacsatada iyo hay'adaha aan macaash doonka ahayn ayaa sidoo kale fursado abuuro, balse qaabka shaqa qoristooda ayaa ah caqabad weyn.

Haddii lasoo koobo, fursadaha jira kuma filna in ay yareeyaan tahriibka dhalinyarada. Su'aasha waxa ay tahay maxay tahay in la qabto?

## Waxyaabaha Laga Gaabiyay

Waxaa jira caqabado hortaagan dadaallada lagu abuurayo fursado waxbarasho iyo fursado shaqo, sarena loogu qaadi lahaa xaaladda nololeed ee muwaadiniinta, taa soo yareyn laheyd tahriibka.

Tan koobaad, dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada ma awoodaan in ay shacabka u qabtaan adeegyadii aasaasiga ahaa ee bulshada. Hay'adaha dowladdu si sax ah uma shaqeeyaan, sidoo kale lunsashada hantida qaranka iyo fursadaha shaqo ee soo baxa oo aan si caddaalad ah loo bixin ayaa wiiqday kalsoonidii ay shacabku ku qabeen dowladda. Waxaa intaas dheer, maamullada jira waxey ku guul dareysteen in ay qorshe u dejiyaan isla markaana jiheeyaan nidaamka waxbarasho ee dalka si markaas dhalinyaradu u hesho tababar iyo waxbarasho ku filan oo u sahli karta in ay dalka gudihiisa shaqooyin ka helaan.

Tan labaad, nidaamka waxbarasho iyo xirfadaha looga baahan yahay goobaha shaqada isma lahan. Dhalinyaro badan ayaa dhameeya waxbarashada dugsiga sare iyo midda jaamacadeed, hase ahaatee badankood ma lahan xirfadihii iyo tababarkii looga baahnaa goobaha shaqo. Tan waxaa sababay maqnaanshiyaha manhaj iyo nidaam waxabarasho. Waxaa taas dheer, inta badan ardada dhameysa jaamacadaha malahan hal-abuur. Dhanka kalena, fursadaha shaqo ee lagu heli karo mushaar wanaagsan waxey u baahan yihiin dad aqoon iyo karti u leh oo kasoo bixi kara shaqada.

Tan saddexaad, waxaa meesha ka maqan mashaariic iyo maalgashi macno leh oo abuuri kara shaqooyin. Waxaa jira warshado dhowr ah oo yaryar kuwaas oo soo saara qalabka looga baahan yahay guryaha. Dowladda waxa ay ku guul darreysatay wax ka qabashada xaaladda

[22] UNSOM, "*Somalia Launches National Youth Policy at Gathering of Country's Youth*", December 2017, https://unsom.unmissions.org/somalia-launches-national-youth-policy-gathering-country%E2%80%99s-youth

ammaanka dalka, taasoo haddii la helo soo jiidan laheyd maalgashi lagu sameeyo dalka.

## Gunaanad

Cilmibaaristan waxaa lagu lafaguray arrimaha ku xeeran tahriibka dhalinyarada Soomaaliyeed. Shacab ku nool toddoba magaalo oo waaweyn oo hoos taga maammullo kala duwan ayaa xog laga ururiyay, lana wareystay. Cilmibaaristan waxa ay muujisay in ay dhalinyaro badan ka tahriibaan dalka xitaa marka lagu daro degaanno uu ka jiro amni wanaagsan. Waxyaabaha sababa tahriibka waa badan yihiin, hasa ahaatee kuwa ugu muhiimsan waxaa kamid ah shaqo la'aan, dhaqaale xummo, tayada waxbarasho ee dalka oo liidata, ku dayasho saaxiibo horay u tahriibay, jiritaanka kooxo ka shaqeeya arrimaha tahriibka, ammaan darro ka jirta dalka, iyo tabardarida hayadaha dowliga ee ku guul dareystay in ay bulshada u abuuraan rajo.

Cilmibaaristan waxaa kale oo lagu ogaaday in tahriibayaasha Soomaaliyeed ay la kulmaan khatarro fara badan iyo caqabado inta ay ku guda jiraan tahriibka sida: dhimasho, xarig, jirdil iyo kufsi. Waxaa intaas dheer, inta badan dadka tahriibay ma helaan wixii ay filayeen marka ay gaaraan dalalkii ay u tahriibeen. In badan ayaa marka ay gaaraan dalalka ay u tahriibeen la kulma nolol adag iyo rafaad. Hayadaha dowladeed, kuwa aan dowliga aheyn iyo beesha caalamkuba waxba kama geysan sidii loo hakin lahaa firxadka dhalinta Soomaaliyeed. Dowladda federaalka, maamuladda gobollada iyo beesha caalamku waa in ay ahmiyad siiyaan sidii wax looga qaban lahaa dhalinta Soomaaliyeed ee fakadka ah iyo sababaha keena tahriibkaba, iyadoo fursado shaqo loo abuurayo dhalinyarada.

## Talooyin tixgelin mudan

Tahriibka waxaa sababa arrimo badan oo isku daaban. Arrimahaas oo xal loo helo ayaana dawo u noqon karta tahriibka. Lama wada joojin karo tahriibka balse waa la yareyn karaa. Si tahriibka loo yareeyo waxaa muhiim ah in fiiro loo yeesho talooyinkan:

**Fursado:** Abuuritaanka fursado shaqo iyo ganacsi ayaa noqon kara kuwo lagu yareeyo tahriibka. Qorshe laga fikiray oo shaqooyin u abuura dhalinyarada Soomaaliyeed [30 sano wixii ka yar] oo lagu qiyaasay in ay 75% ka yihiin mujtamaca Soomaaliyeed[23] ayaa ah mid loo baahnaa waqti hore. Waa tallaabo wanaagsan in Qorshaha Horumarinta Qaranka (National Development Plan) lagu daray wax ka qabashada tahriibka. Qorshahan waxaa ku qoran in la abuuro shaqooyin, xirfado loo abuuro dhalinyarada, in la helo nidaam daryeel bulsho iyo in la helo nidaam, shuruuc iyo horumarinta hayadaha

[23] United Nations Population Fund, "POPULATION ESTIMATION SURVEY 2014 FOR THE 18 PRE-WAR REGIONS OF SOMALIA", (2014): 42 – 43.

dowliga.[24] Qorshahan oo si dhab ah loo fuliyo wuxuu yareyn karaa tahriibka.

Soomaaliya waxa ay leedahay kheyraad fara badan oo la adeegsan karo. Maalgashi lagu sameeyo beeraha, biyaha, xoolaha, iyo kalluumeysiga wuxuu shaqo u abuuri karaa in badan oo kamid ah dhalinyarada. Hase ahaatee, si tan loo helo waxaa lagama maarmaan ah in dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada ay kordhiyaan miisaaniyadda loogu talo galay ka faa'ideysiga kheyraadka dalka iyo in la dhiiri geliyo maalgashi shisheeye. Waa in la dhiiri geliyaa wada shaqeyn dhex marta dowladda iyo ganacsatada. Si looga miro dhaliyo qorshayaashan waxaa loo baahan yahay in la helo nabadgelyo.

Dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada waa in ay abuuraan nidaam caddaalad ku dhisan oo shaqaalaha lagu xusho. Muwaadiniintu waa in ay si siman oo caddaalad ku dhisan u heli karaan shaqo iyadoo aan la tixgelineyn qabiil iyo lahaansho baasaboor qalaad. Dhaqanka Soomaalida ee qabiilka ku saleysan iyo burburkii dowladdii dhexe ayaa sii dhiiri geliyay ku tiirsanaanta qabiilka iyo xigtada ee fursadaha. Waa in wax laga bedelaa qaab dhaqankan isla markaana ahmiyad la siiyaa tayada iyo aqoonta qofka la shaqaaleysiinayo. Tani waxa ay xoojineysaa hayadaha dalka iyo tayada waxbarashada dalka.

**Wacyigelin:** Dhalinyarada oo lagu baraarujiyo khatarta uu leeyahay tahriibka ayaa noqon karta mid yareysa tahriibka. Hay'ado maxalli ah iyo kuwo caalami ah ayaa sameeya baraarujin, hasa ahaatee ololahoodu ma aha mid mideysan. Ololaha waa in uu noqdaa mid joogto ah oo dhalinyarada uga diga khataraha tahriibka iyo nolosha dhabta ah ee ka jirta wadamada loo tahriibayo. Wacyigelinta dhalinyarada iskuulada dhigta ayaa muhiim ah. Wacyigelin ay sameeyaan culimada diinta iyo saxaafadda ayaa iyana lagama maarmaan ah. Waxaa sidoo kale muhiim ah in Soomaalida horay ugu tahriibtay waddamada Yurub, Aasiya iyo wadamada kale ee Afrika ay qeyb ka noqdaan wacyigelinta iyagoo adeegsanaya baraha bulshada. Kuwa horay u tahriibay ee dalka dib ugu soo laabtay oo iyagu ka dheregsan khataraha tahriibka waa in ay door muuqda ka qaataan ololaha wacyigelinta.

**Waxbarasho nidaami ah tababarro farsamo:** Waxbarashadu waxa ay kaalin weyn ka qaadataa yareynta tahriibka. Waxbarashada dalka ka jirta waxa ay gacanta ugu jirtaa ganacsato, sidaa daraadeed dhalinyarada kasoo jeeda qoysaska saboolka ah ma helaan waxbarashadii ay u baahnaayeen. Dowladda federaalka, maamul goboleedyada iyo hay'adaha caalamiga ee deeqda bixiya waa in ay iska kaashadaan sidii loo heli lahaa waxbarasho tayo leh oo lacag la'aan ah. Waa in la dedejiyaa sameynta guddiyada waxbarashada si sare loogu qaado tayada waxbarashada. Nidaam

[24] Federal Government of Somalia, "National Development Plan", Ministry of Planning, Investment and Economic Development, Mogadishu, Somalia, 10(2016): 123 -125.

waxbarasho oo tayo leh wuxuu qeyb ka qaadanayaa soo saaridda arday diyaarsan oo door muuqda ka cayaarta dib usoo nooleynta dhaqaalaha, xasilloonida iyo tayada hayadaha dowliga iyo kuwa aan dowliga aheyn.

Tababarro farsamo oo loo helo dhalinyarada ayaa sare u qaadi karta fursadahooda shaqo. Helitaanka tababaradan waxa ay sahlayaan in ay dhalinyaradu helaan fursado aan aheyn in ay tahriibaan.

**Nabad iyo xasilooni:** Waa in laga shaqeeyaa nabadda iyo xasiloonida magaalooyinka Beledweyne, Muqdisho, Baydhabo, iyo Kismaayo. Xasillooni darro ka jirta goobahan ayaa la sheegay in ay keento tahriibka. Ammaanka degaanadan oo wax laga qabto waxa ay hoos u dhigeysaa dhalinyarada tahriiba.

**Ilaalinta Xudduudaha:** Dadka ka macaasha tahriibka ayaa ka faa'ideysta xudduudaha dalka oo aan xakameysneyn. Xudduudaha dalka oo la xakameeyo waxa ay saameyn ku yeelan kartaa tahriibka. Maritaaka dalka Itoobiya ma aha mid ay jecel yihiin tahriibayaasha, sidaa daraadeed waxa ay maraan dhanka Boosaaso oo aan xakameysneyn. Wada shaqeyn dhex marta dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada ayaa lagu xakameyn karaa xudduudaha.

**Abuuridda rajo iyo fursado nolol wanaagsan:** Burburkii dowladda dhexe iyo sanadihii uu dalku ku jiray burburka, nidaam darrada dalka ka jirta iyo tabar yarida hayadaha dowladda federaalka iyo kuwa maamul goboleedyada, ayaa niyad-jab ku riday rajadii dhalinyarada. Dhalinyarro badan oo noo warramay ayaa ku celceliyay sida aaney wax kalsooni ah ugu qabin dowladda iyo sida aaney ugu filayn mustaqbal wanaagsan. Waa in dowladda iyo hay'adaha aan dowliga aheynba iska kaashadaan sidii rajo loogu abuuri lahaa dhalinyarada. Waa in la abuuraa mashaariic ku wajahan dhalinyarada sida maktabado, xarrumo lagu cayaaro, iyo goobo dhalinyaradu ku kulmaan, si dhalinyaradu u dareemaan in ay bulshada kamid yihiin, rajadoodana loosoo celiyo.

The Heritage Institute For Policy Studies